Taxanaha suugaamaynta culuumta shareecada

SIIRADA NEBIGA SCW



Cabdiqani Agaabeeye


بسم الله الرحمن الرحيم
جمال نجاتی

قال الإمام مالك:

"ما كان لله دام واتَّصل، وما كان لغيرِ الله انقطع وانفصل"

Dar Ilaahay camal loo qabtaa daa'imoo jira e
Dano kale hadday soo galaan dabargo' weeyaane
Alloow damacu yuu ila durkine samaha iisoo du'.
Aamiin.

TUSMADA BUUGGA

1) TUSMADA BUUGGA 4
2) GOGOLDHIG 6
3) HORDHAC 7
4) AHMIYADDA BARASHADA SIIRADA NEBIGA SCW 12
5) MAGACYADII IYO TILMAAMIHII NEBIGA SCW 12
6) XAASASKII NEBIGA SCW 13
7) UBADKII NEBIGA SCW 13
8) HABDHAQANKII NEBIGA SCW 14
9) KHADIIJA 14
10) DHISIDDII KACBADA 16
11) BILAWGII WAXYIGA 16
12) MAALMIHII QARSOODIGA: 17
13) MAALMIHII CIQAABTA 18
14) HIJRADII XABASHA 19
15) ISLAAMIDDII XAMSE IYO CUMAR RC 20
16) TASHIGII QURAYSHEED 21
17) GO'DOOMIN 22
18) SANNADKII MURUGADA 23
19) DAA'IF 23
20) DHEELMINTII NEBIGA SCW 24
21) BALLANKII ANSAAR 25
22) HIJRADII NEBIGA SCW IYO SAXAABADA 26
23) SAFARKII NEBIGA SCW EE MADIINA 27
24) XAALADDII MAGAALADA MADIINA 28
25) SHAQADII UGU HORRAYSAY EE MADIINA 29
26) KA HOR DAGAALKII BEDER 30
27) DAGAALKII BEDER 30
28) KA HOR DAGAALKII UXUD 32
29) DAGAALKII UXUD 33

30) KA HOR DAGAALKII AXSAAB 34
31) DUULLAANKII AXSAAB IYO QURAYDA 35
32) KA DIB DAGAALKII AXSAAB 37
33) DUULLAANKII MURAYSIIC 38
34) KA DIB MURAYSIIC 38
35) CUMARATUL XUDAYBIYAH 39
36) FARRIIMIHII BOQORRADA 40
37) DUULLAANKII AL-QAABAH 40
38) DUULLAANKII KHAYBAR 40
39) DUULLAANKII DAATU AL-RIQAAC 41
40) CUMRATU AL-QADAA 42
41) DUULLAANKII MU'TAH 42
42) FURASHADII MAKA 43
43) DUULLAANKII XUNAYN 44
44) DUULLAANKII TABUUK 45
45) XAJKII ABUU BAKAR 46
46) SANNADKII WEFTIYADA 46
47) XAJKII SAGOOTINTA 47
48) GEERIDII NEBIGA SCW 48
49) GUNAANAD 48
50) DUCO IYO DARDAARAN 49

GOGOLDHIG

Buuggan yari, waxa uu soo gudbinayaa siiradii qiimaha iyo qaayaha badnayd ee Nebigeenna sallallaahu calayhi wasallam. Taas oo noqonaysa qaab suugaaneed godka gabayga ah, kana kooban tixo fara badan oo kala xarafraac ah. Waa hannaan ay culimadu adeegsan jireen badanaa marka ay rabaan in ay soo gudbiyaan waxii la xidhiidha aqoonta shareecada; iyaga oo adeegsanaya masafo hadba xaraf ku socota. Buuggani se waa tixo dhawr ah, cinwaan kasta tix u goonni ah ayaa uu leeyahay. Wadarta meerisyadu waa **kun meeris** (**alfiyo**). Wax meeris ah oo xigasho ah waxa ku jira meeriskan *"waa uun wadyahan shay adduun lagu wayiigaaye*" oo uu lahaa Salaan Carrabay AHUN.

Waxa aan raaciyey sharraxaad yar oo kooban, oo noqonaysa furfur aan ku sameeyey meerisyada qaarkood, taas oo ay keensanayso arrimo dhawr ah, **sida**:

1) Abtirsiimo loo sameeyey dadka lagu xusay meeriska
2) Eray cusub oo laga yaabo in aan hore loo fahmin oo eray la mid ah lagu sharraxo
3) Eray Carabi ah oo la sheego macnihiisa oo Soomaali ah IWM.

Waxa aan u mahadnaqayaa -mahadda Alle SW ka sokow- cid walba oo talo iyo tusaale igu siisay in aan ibafuro barnaamijkan qiimaha leh ee aan ugu magacdaray ***Suugaamaynta culuumta shareecada***. Si gaar ah waxa aan u mahadnaqayaa akhyaarta kala ah: Daa'uud Cali, Ridwaan Cabdilkariim, Mursal Muxammad, Cabdilqaadir Shire, iyo Xamse Axmed, oo dhammaantood iga la qayb qaatay sixidda iyo soosaarista buuggan. Kani waa wejigii koowaad ee barnaamijka, kuwo kalena waa ay raaci doonaan inshaa Allaahu tacaalaa.

Waxaan Alle ka baryayaa in uu innagu anfaco, kana yeelo mid loo aayo wakhti xaadirkan iyo waayaha dambeba. Aamiin.

Wabillaahi tawfiiq.

Cabdilqani Muxammad Ismaaciil

Buraydah, K.S.A, Jimce 13-05-1446.

HORDHAC

1) Marka hore Allaan magansadee, amarki aan qaato
2) Rasuulkii udgoonaa isana, eray ku maamuuso
3) Suxuftii Ibraahiim iyana, maanso ku abbaaro
4) Annajmiyo kolkii aan akhriyey, Eebbe hadalkiisa
5) Allahayoow adaa naga alkumay[1], shay itaal darane
6) Adigaa abaalkiisa marin, ruuxba orodkiiye
7) Axad kalena adigaan ku rarin, eedo ruux kala e
8) Qosol lala ilmeeyiyo adaa, oohin maamula e
9) Ambaqaadka geeddigu aduu, kugu idlaadaaye
10) Abaar iyo adaa kala beddela, aaran[2] iyo dooge
11) Adigaa dabayshaw igmaday, Iramki[3] reer Caade
12) Carra edeg ma jirin ruux kuwaa, loo dhigaa abide
13) Arbayaal raggii sheegan jiray, baan atoor noqone[4]
14) Aboor baa ku baxay meeelahay, ku isirraayeene
15) Ceelkii Axqaaf[5] kama cabbaan, omoska jiilaale
16) Isbuuc bay dabayluhu dhegaha, ku onkodaayeene
17) Addimaday sidii qori la jaray, kor ugu taageene
18) Adigaa Thamuud iyo askumay, odayadoodiiye
19) Irmaantii Rasuulkay[6] dileen, oommanta ahayde
20) Eeridhabanka[7] waxa looga dhigay, aayad goonniyahe
21) Kalkii loo asteeyeey damceen, inay ka xoogaane
22) Magligay[8] afeeyeen ayaa, laayey idilkoode
23) Inkastooy sagaal eed galeen, malag ku eedaanye
24) Itifaaqa waxa lagu ahaa, ul iyo diirkeede

---

[1] – Abuuray.
[2]– Barwaaqo
[3]– Waa magac qabiil ama se waa deegaankooda.
[4]– *Arbe*: maroodiga lab, *Atoor*: sakaarada lab.
[5]–Waa meeshii ay degganaayeen.
[6]– Nebi Saalix (cs)
[7]– Hal dhashay oo ilmihii laga reebay.
[8]– Billaawe

25) Ina Saalif[1] baa cagaha jaray, oo abaaldhacaye
26) Adyaddooda adigaa halligay, ururki reer Nuuxe
27) Cirka iyo dhulkaa lagu afrogay, umal[2] daraaddiiye
28) Inankiyo islaantii dhashaa, raacay umaddiiye[3]
29) Gaal aabbihii nebi ahaa, baa ayaan darane
30) Anshaxlaawayaashii[4] adaa, oodohood rogaye
31) Afka ciidda loo daray ayaan, cidi iswaydiine
32) Arxan ma leh sidii loo halligay, edebxumaantoode
33) Adigaa adduunkiyo mulkiya, daarta aakhiro e
34) Adigaa addoomaha mar kale, dibu ahaysiine
35) Ayaamahana adigaa rogroga, oo agaasima e
36) Afaggaalla[5] adigaa ka lulay, aag u goonniyahe
37) Mana jiro ilaah kuu dhigmoo, loo irkanayaaye
38) Baahida aduun[6] bay khalqigu, kugu la eertaane
39) Waxaa tahay mid aan aabbe dhalin, dihanna[7] awlaade
40) Adigaan ardaa iyo lahayn, oori iyo xaase
41) Adigaan asmaadaada bilan, cidi u eekaane
42) Ceebahana adigaa asturay, aadanuu galo e
43) Arsaaqdiyo adaa meel ku qoray, calafka iinsaane
44) Iniin[8] qudha ku dari waa ninkii, orod la xiimaaye
45) Waa uun asbaabtee gamcuhu, walax ma uumaane[9]
46) Mar baad ruux ash[10] wayn aan lahayn, ubaxa saartaaye
47) Marra boqor abbaanduula baad, eber ka yeeshaaye
48) Ilaalada raggii yeelan jiray, iil yar buu galaye

---

[1]-Qudaar ibnu Saalif

[2]- Cadho.

[3]- Ina Nebi Nuux iyo xaaskii Nebi Nuux CS.

[4]- Qoomkii Nebi Luud

[5]-Toddobada xiddigood ee raqaha tan ugu dambaysa, una dhexeysa nuguushicad iyo naafcadde. Quraankana waa lagu sheegay, gaar ahaan suuradda Al-najmi. Waa xiddigga loo yaqaan Shicraa.

[6] - Adiga uun.

[7]- Aan dhalin carruur.

[8]- Midhaha ay dhirtu ka abuuranto.

[9]- M abuuraan.

[10]- Waxtar

49) Ma aflaxo adduunyada ninkii, igadhsalaaxaaye[1]
50) Ninkii ayro[2] subax maali jiray, adhijir weeyaane
51) Adigaa umuuraha cakiran, lagu la aadaaye
52) Awooddaada Eebboow qof ogi, kuma illaaweene
53) Acmaashiyo wanaaggiyo werdiga, kama ag rooreene
54) Irridaha cadaabtaada wayn, kuma arooreene
55) Iblays iyo intii taabacdaa, kuma adeegteene
56) Amarkaaga Waynoow ma jiro, ruux inkirayaaye
57) Asaraarid mooyee sharciga, kama irdhoobeene
58) Ashahaadda way garanayaan, mana addeecaane
59) Kashoodaa ogsoonee dibnaha, kama ajiibaane
60) Abuu Jahalladaa nagu batiyo, unugyo shaydaane
61) Afka kaga ma qawlaan xaqii, uurku aamminaye
62) Isdiiddooyin badan baa dhextaal, aragtidoodaase
63) Afartaa dhan iyo bayna jiho, aballin[3] weeyaane
64) Waa wada astaan muuqatoo, lagu islaamaaye
65) Ashqaraarka eegmada cirkaan, ku istareexnaaye
66) Arladaa ku filan shay kastoo, lagu dul aasaaye
67) Amakaagga geeduhu iyana, waa ab goonniyahe
68) Arrin ma laha ruuxii qalbiga, laga he awdaaye
69) Abdo[4] ma laha ruuxii lumee, la ibtileeyaaye
70) Eedaadka ruuxaad baddaa, eel[5] ka bixi waaye
71) Uruguu[6] la noolaan ninkii, agab xumaadaaye
72) Qalbigiisu ruuxuu engegey, ma laha iidaane
73) Isagoo indhaa kala hayuu, aragga beelaaye
74) Ambad weeye ruuxaad Alloow, ababin waydaaye
75) Akhyaar iyo adaa noo sharraxay, ehelu naareede

---

[1]- Igadh: neef (hal) irmaan oo aan ilmo lahayn oo la maalo.
[2]- Tulud geel ah.
[3]- Barwaaqo.
[4]- Dheef (Faa'ido).
[5]- Dhibaato.
[6]- Murugo.

76) Ixsaankaaga mooyee qofnaba, ukun ma yeesheene
77) Oggolaanshahaagaa khalqigu, ku intifaacaaye
78) Haddii aanad dhaafayn dambiga, axad ma joogeene
79) Ilxaadkiyo Calmaanigu arliga, kuma abuurmeene
80) Abudhkiyo[1] xumbada qawlallada, kama afuufeene
81) Sida awrka kaadida sibraha[2] , ma isku saydheene
82) Haddii aanad iidsiinahayn, ma arradbeeleene
83) Ilaahdiid nin sheegtaad Alloow, ubadka siisaaye
84) Ogsijiinna waad ugu dartaa, aanu iib geline
85) Ayddin[3] baad u yeeshaa hantiyo, aqallo waawayne
86) Sida Aar markuu aadumaad,[4] aad yar qabataaye
87) Ajashaad ka goysaa nimaan, eebo[5] kaa filane
88) Adhaxdaad ka wiiqdaa markuu, tiisa aammino e
89) Unuunkaad[6] jartaa ruux qalbiga, laga asiibaaye
90) Arraxmaan ninkii daalacdaa, amar u yaallaaye
91) Alxaaqana ninkii garanayaa, maba israafeene
92) Alamtara ninkii loo marshaa ma abrahoobeene [7]
93) Afdhaadhiga[8] xafiday suuraduhu, gabay ma eegeene
94) Abwaannadu tixaa may tirsheen, afafka maalaaye
95) “Illaadaa”[9] ninkii soo galaa, odhan lahaa kaase
96) Awliyadu inay meeriyaan, ma laha eedayne
97) Nin Islaama inuu aarsadaa, ma aha aafaade
98) Inta kale se waa milil[10] ku yaal, uurka aadmiga e

---

[1]- Xumbo (siiba midda uu soo saaro awrka qooqan)

[2]- Lugta dambe ee geela boqonteeda.(Seedda lugta dambe ee geela)

[3]-Noocyada geela mid ka mid ah.

[4]- Daallin noqdo.

[5]-Waran.

[6]- Madaxa.

[7]- Ninkii damcay inuu dumiyo kacbada sidiisii oo kale ma faleen.

[8]- Afyaqaan.

[9]-Waa eray Carabi ah, oo muujinaya shay wax badan laga soo reebayo, waxana ay ku soo aroortay aayadda 227-aad ee suuradda Al-shucaraa’. Oo muujinaysa in gabaygu aanu nafci lahayn marka laga reebo kuwa iimaanka laga helay ee camalka suubban sameeyey, Allena xusay ee aarsanaya markii la dulmiyey ka dib.

[10]- Boog.

99) Labiidkii Alcaamiri[1] ahaa, ka anfariir luuqe

100) Albaqrana markii uu xafiday awday dhegihiise

101) Imaamkii isana Shaafacaa[2], meel ku aabbudhaye

102) Inkastuu waxoogaa ka tegay, kama abraareene

103) Aniguna tixaa diinigaan, yara abqaalaaye[3]

104) Uskaggiisa waan daynayaa, Eebbe idankiiye

105) Inuu aayihii daran yahaan, eeggan[4] aamminaye

106) Istiqfaar Alloow igaga maydh, aragxumaantiisa

107) Awgiyo[5] wadaadkaa hor gala, ololka naareede

108) Aqoontaan Ilaah kuu dhawayn, aayatiin ma lehe

109) Alxamduna kolay tahay xujay, kugu abuurtaaye

110) Adigoo agnaanaa[6] ka roon, alif xumaadaaye

111) Ikhlaas iyo Alloow nooga yeel, adiga awgaaga

112) Arartaydu waxay daarran tahay, waad ogsoon tahaye

113) Siiradii[7] udgoonayd ayaan, ibafuraynaaye

114) Aan bilaabo taariikhdu waa, lama illaawaane

115) Abtirsiimo Nebigaad ku baran, ehelladiisiiye

116) Asxaabtii Rasuulkaad ogaan, ubaxu saarraaye

117) Arwaaxdeennu waa quudka ay, ku istareexdaaye

118) Marra waa ushuu garabsadaa, ruux indhool ahiye

119) Iimaanna waa laga helaa, aad u qara wayne

120) Ila soco haddaan kaaga rogi, ilaxidh[8] saarraa.

---

[1]- Labiid ibnu Rabiica Alcaamiri

[2]- Muxammad ibnu Idriis Alshaafici.

[3]- Sameeyaa.

[4]-Xilligan.

[5]- Wadaad aan aqoon badan lahayn.

[6] - Jaahil

[7]- Siiro: waa aqoonta ka warranta noloshii Nebiga (SCW), dedaalkiisii diimeed iyo dhacdooyinka la xidhiidha.

[8]- Maro, derin iwm. Oo aqal, qol, iwm lagu kala qoqobo "Daah".

AHMIYADDA BARASHADA SIIRADA NEBIGA SCW

122) Maxabbada Rasuulkeenna wayn, waa mid waajibahe

123) Waa mudanka iinsaanka iyo, idil Malaa'iige

124) Maba jirin makhluuqaadka ruux, lagu misaalaaye

125) Murtad[1] weeye kii Suubbanaha, eray ku maagaaye

126) Mushrig[2] weeye kii saacad uun, maru sujuudaaye

127) Waa uun majnuun kaan aqoon, magacyadiisiiye

128) Ee weliba maalaayacniga, mudan u haystaaye

129) Waa macangag[3] ruuxii salliga, lagu dul miisaaye

130) Ee aan muddeec noqonninee, madasha joogaaye

131) Murti ma laha weedhaan salliga, lagu mataanayne

132) Manfac ma laha buuggaan digriga, lagu he muunayne

133) Mugga waxaan rabaa inaan ku baro, malabki Doocaane[4]

134) Aan maggaabsho[5] maansada haddaan, marag u haystaaye

135) Tixda maala meel durugsan buu, maqalku gaadhaaye

136) Waa Raxiiq Makhtuum kaan rabaa inaan macneeyaaye[6]

137) Ninka qorayna waa macallinkii magaca waynaaye

138) Ee Mubaarakfuuriye cilmigan Mawleheen baray.

MAGACYADII IYO TILMAAMIHII NEBIGA SCW

139) Axmed, Muxammad iyo Caaqib iyo, Maaxi iyo Xaashir

140) Shantaas muuqa wayn lihiba waa, magacyadiisiiye

141) Makuu ku dhashay sannad loo yaqaan, kii maroodiga e[7]

142) Muuqaalka jooggiisu waa, meeldhexaad wacane

143) Madow iyo caddaaniyo haddana, ma aha maarriine

---

(1) - Nebiga SCW oo la caayo diinta ayaa lagaga baxaa.

(2)-Gaal.

(3) - Qof aan waxba laga dhaadhicin karin.

(4) - *Malabka doocaan* : waxaa loo adeegsadaa shayga qiimaha badan, asalkiisuna waa webi ku yaalla dalka Yaman oo malab wanaagsan oo adduunka ka sheeggan laga dhoofiyo, Soomaalida dhexdeedana caan buu ka ahaa muddo dheer, waxa la mid ah timirta Doocaan oo Iyana suugaanta ku jirta.

(5) - Maggaabo; waa cantuugo wayn oo caanaha la cantuugo. Halkan se waxa laga wadaa: bilaabid.

(6) - Alraxiiq Almakhtuum, waxa qoray Safiyurraxmaan Almubaarakfuuri oo dhintay 1-dii December, 2006.

(7)- Caamul fiil 20-kii April 571 ee Miilaadiga.

144) Midabkaa casaankuu[1] lahaa, Mawle uu xulaye

145) Afartanka markuu gaadhay buu helay mahiigaane[2]

146) Mudanii Jibriil wuxu ahaa, macallinkiisiiye

147) Majaraha waxyigu soo maruu, malaggu taagnaaye

148) Muddadaas ba waa tuu ahaa, kuu maciinsado.

XAASASKII NEBIGA SCW

149) Marwadii khadiijiyo[3] Xafsay, minan wadaageene

150) Maymuun Juweeriya Ramliyo, magacsantii Caasha

151) Waa Umul masaakiin middii, bixisay maalkeede

152) Umu Salama loo miis iyana, sharafyo maamuuse

153) Milgahana Safiya iyo waxaa, mudatay Sawdaa e

154) Saynabtii Ilaah meheriyaa, miratay faankii.

UBADKII NEBIGA SCW

155) Wiilkiisa curad wuxu ahaa, Qaasim caambaxaye[4]

156) Curubtii[5] Ruqiya, Ummu Kalthuum, ceeb Allaan badine

157) Labadaba Cismaan baa calmaday[6], Ina Cafaankiiye

158) Faadumo Rasuul waxa calfaday, Caligi waynaaye

159) Abul Caas markuu soo muslimay, Saynab loo celiye

160) Cabdalliyo Ibraahiim iyana, waa carruur Nebiye

161) Wiilashaasi may ciidamine, laga carrawsiiye

162) Curdin[7] baa wadkii loo xukumay, ciidda hoos dhigaye

163) Gabdhuhuna hortii bay carriga, kaga carceereene[8]

---

[1] -Midabka Nebigu SCW waxa uu ahaa casaan lagu badhxay caddaan.

[2] -Waxa laga wadaa markii uu Nebigu SCW 40 jirsaday ayaa uu waxyigu ku bilaabmay.

[3]- Khadiija bintu Khuwaylid, Xafsa binti Cumar, Maymuun binti Xaarith, Juweeriya binti Xaarith, Ramla binti Abii Sufyaan, Caa'isha binti Abii Bakar, Saynab binti Khuzayma "Umul masaakiin", Hinda binti Abii Umaya"Umu Salama", Safiya binti Xuyayi, Sawda binti Zamca iyo Saynab binti Jaxshi.

[4]-Waa wiilka uu Nebigu SCW kunyada ka dhigtay. Oo waxa la odhan jiray Abul Qaasim.

[5]- Doog aad u jilicsan. Halkan se waxa laga wadaa qof wanaagsan.

[6] - Waxa laga wadaa guursaday.

[7]- Naq ama midho markaa soo baxay oo aan weli gahaydhoobin. Halkan se waxa laga wadaa yaraan.

[8]- *Libdhid* ama tegid. Halkan se waxa laga wadaa dhinteen.

164) Faadumo casiisaa ahayd,caynad goonniya[1]

HABDHAQANKII NEBIGA SCW

165) Ammintaaba waxa loo yaqaan, Muxammad Aamiine

166) Ammaan waxawgu filan inu ahaa, ehelu tawxiide

167) Weligii asnaam uma irkane, ka anfariir kaase

168) Ammaanada waxaa uu ahaa, ruux Ilaah baraye

169) Adhiraacidduu ku cindanaa, gooriyo ayaane

170) Ambiyadu jid ay soo mareen, amarku weeyaane

171) Aroosyada ciyaaraha ma tegin, lagu asqoobaaye

172) Ma ambane waxaa uu ahaa, ayni goonniyahe

173) Addoon saalixoo toosan buu, abid ku sheegnaaye

174) Wuxu haystay waa aragtidii Nebi Ibraahiime

175) Ashahaadda waa uu yaqiin, erayga tawxiide

176) Iimaanku waxa uu ahaa, shaygu aamminaye

177) Acmaashiyo waxaa uu jeclaa, ay[2] inuu tago e

178) Dabadeedna uu Eebbihii, aad u caabudo.

KHADIIJA

179) Iyadana Khadiijuu hantida, Shaam u gayn jiraye

180) Isagoo macaashuu ka yimi, Eebbe mahaddiiye

181) Dabadeed halkaasay afgarad, aqal ku taageene

182) Awlaadna way kala heleen, aad u tiro wayne

183) Ibraahiim markii laga yimaad, ubadka aan sheegnay

184) Iyadaa u hooya ah lixdii, ubaxu saarraaye

185) Qasribaa abaal looga dhigay, hoyga aakhiro e

186) Salaan buu u soo diray Ilaah, iyada awgeede

187) Udub bay Rasuulkaw ahayd, adhaxda diimeede

---

[1]- Lix bilood ayaa ay Nebiga SCW ka dhimasho danbaysay.

[2]- Bannaannada ama buuraha dadka ka fog ayaa uu tegi jiray oo uu ku cibaadaysan jiray Nebigu SCW.

188) Ixsaankay samaysuu in badan, ugu ogsoonaaye

189) Abul Caas[1] darteed baa xabsiga, looga aayaraye

190) Siiddaa markii uu la yimi, luulki oorida.[2]

[1]- Ninkii ay u dhaxday inantii Nebiga SCW ee Saynab

[2]- Waa qalab xarrago oo ay lahayd Khadiija kuna danbeeyey Saynab, kaas oo maalinkii Beder u noqday madaxfurasho, balse Nebigu SCW kama uusan qaadin.

DHISIDDII KACBADA

191) Waxa dumiyey baydkii Ilaah, daadad fara wayne

192) Dabadeedna waxa ay damceen, inay dedaalaane

193) Dibudhise kolkay xoolo badan, ugu he deeqeene

194) Wixii daahiraa looga xulay, dayactirkiisiiye

195) Dar Ilaahay inay doonayaan, qawl ku daabaca e

196) Dirhamkay hayeen gaadhiwaa, iyo dannaaniire

197) Loo daa sidaas oo kolkaa, dayrka qayb xidha e

198) Isku diide kii dhigi lahaa, dhagaxa daaftiiye

199) Ninkii ugu da'waynaa[1] u keen, shay dawayn kara e

200) Lagu diirsay hadalkiisa oo, daacad loo noqoye

201) Wuxu yidhi dadyohow muranka waa, lagu dayoobaaye

202) Ninkii daartan soo gala ayaa, dood inoo qabane

203) Daahaa[2] kolkay milicsadeen, loo durbaan tumaye

204) Nin waliba go'ii dacalka qabay, oo dushana saarye

205) La dabiib colaaddii halkaas, laguna daawee.

BILAWGII WAXYIGA

206) Guga afartanaad bay dhammaan, garasho buuxdaaye

207) Marku gaadhay Nebiguna Allaa, gaar usoo xulaye

208) Guud ahaan farriin baa la yidhi, dunida gaadhsiiye

209) Jibriil baa u soo galay godkii, gurada waynaaye[3]

210) Inta uu gilgilay buu ku yidhi, xaqa ku geeraare

211) Garan maayo waa kii ku yidhi, geesigii Nebiye

212) Goortii labaad buu haddana, ciijiyoo gubaye

213) Guullaha Ilaah buu ku yidhi, gudo xaqiisiiye

214) Ka guddoon Iqraa Suubbanuhu, gabalka koowaade

215) Nebigoo gariiraaya baa, aaday gurigiiye

---

[1] – Abuu Umaya ibnul Muqiira Almakhzuumi.

[2]– Waxa laga wadaa Nebiga SCW, waxaana uu ku soo arooray suuradda Daaha, khilaaf ayaana ku jira macnaha looga jeedo, culimada qaar waxa ay ku macneeyeen in uu yahay magac Alle, halka ay qaar kalena dheheen waa magac Nebigu lahaa, aragtiyo kalena way ku jiraan.

[3] – Qaaru Xiraa'

216) Gaaridii haweenkuu ku yidhi, go'a isoo saare

217) Gocashada dhibtuu qabay u sheeg, gacaladiisiiye

218) Hadal gaaban oo waxay ku tidhi, qooyey gebigiise

219) Xaqaad garab istaagtay ku tidhi, una gargaartaaye

220) Martidaad u gawrici taqaan, gogolna siisaaye

221) Gasiinkaad heshaa bay ku tidhi, gacal ku soortaaye

222) Geddaadaa Ilaah waa yaqaan, saamiguu galo e

223) Waxay gaysay guriguu lahaa, Waraqa[1] goortaase

224) In uu guusha nebinnimo hayuu, sheegay galabtaase

225) Gaaladu inay saarayaan, hadal ku soo gooye

226) Mudduu go'ay imaanshii waxyigu, waana gaagaxaye[2]

227) Kaddib buu godladay[3] oo xaqii, gaawe[4] loo culay.

MAALMIHII QARSOODIGA:

Muddadii dacwaddu ay hoos u socotay iyo dadkii ugu hor islaamay

228) Qadiijaa islaamtiyo ninkii, qaaliga ahaaye

229) Abuu Bakar qaliifkii[5] ahaa, ina Quxaafiiye

230) Qaaday diinta Zaydkii isana qiimahaa helaye[6]

231) Iyo Cali ninkii qoodha iyo, qaariga ahaaye

232) Quwaddiisa ruux uu qallacay, qoomamaa xigaye

233) Dabadeedna qaar kale ayaa, qaatay amarkiiye

234) Dhawr qoys ayaa diinta iyo, qiray xaqeediiye

235) Nimankii Quraysheed warkaas, kuma qadhaadhoone[7]

236) Qiimana lamuu yeelan oo, lalama qiiroone

---

[1]-Waraqa ibnu Nawfal, waxa uu ahaa caalim haystay diinta Kiristaanka oo ay Khadiija ilma'adeer ahaayeen.

[2]-Waxa loo adeegsadaa marka neef godlan oo caano ku taagnaayeen ay dib ugu cararaan, waxa se laga wadaa halkan in uu waxyigi joogsaday.

[3]-Dib ayaa uu u bilaabmay

[4]- Hadhuubka caanaha lagu liso.

[5]-Waxa uu caan ku ahaa Khaliifkii Nebiga scw, oo laga wado in uu booskii maamul ee Nebiga galay.

[6]-Nebiga SCW ayaa aad u jeclaa, intaan la xarrimin ka-ilmo-yeelashada (tabanni) qof aanad dhalinna; Nebiga ayaa uu wiil u ahaa.

[7]- Wax dhib ah umay gaysan

237) Saddex sano qiyaastii ayaan, qawlku daahirine
238) Ka dib buu Quraan soo degoy, qaraxday baaruude
239) Kor u qaad Islaamkaa la yidhi, qolona gaadhsiiye
240) Gaalkii qamuunyada xumaa, waa ka qaaddacaye[1]
241) Tabbat baa qasaaraha ku dhacay, qeexday berigaase
242) Illaa iyo qiyaamaha ayuu, qalinku suurayne
243) Qaraabada Rasuul inuu ahaa, shay umay qabane
244) Laga quusay ruuxii Ilaah, diin ka qadiyaaye
245) Qaddarkaan la baajine barquu, qiran lahaa uune
246) Qalad buu waxyigu noqon lahaa, iyo quraafaad.

MAALMIHII CIQAABTA

La dagaallankii dacwadda iyo ciqaabiddii muslimiinta

247) Markii loo caddeeyeey xaqii wada cadhoodeene
248) Muslimkay ciqaabeen intay, dhabu colaadsheene
249) Bilaal bay cabiidsheen raggii, caasiga ahaaye
250) Waalidkii Cammaar[2] iyo dar kale, cadawgu naafeeye
251) Cifriidkii[3] Abuu Jahal ahaa, ceeb kamuu tegine
252) Cajuusado kolay tahay ma dayn, cadho daraaddeede
253) Xujaydii cibaadada u timi, Nebiga loo cay e
254) Cuqdad bay ku beereen dadkii, caadiga ahaaye
255) Ina Camar Dufaylkii[4] ahaa, taasi may celine
256) Cudbigii dhegaa loo geshuu, caasiyoo qubaye
257) La carraw xaqii oo tolkii, cadarka gaadhsiiye
258) Calaamana ushaa looga dhigay, inay casaataaye
259) Colkii reer Quraysheed ma dayn, camalladoodiiye
260) Abuu Daalib bay uga cawdeen, calanka tawxiide

[1]- Abuu Lahab ayaa laga wadaa.
[2]- Cammaar ibnu Yaasir, aabbihii Yaasir iyo hooyadii Sumaya waxa ciqaabi jiray Abuu Jahal "Camar ibnu Hishaam"
[3]- Nooc ka mid ah jinka weeyaan, halkan se waxa laga wadaa qof dhib badan.
[4]- Dufayl ibnu Camar Aldawsi.

261) Carcartiyo[1] dhibaatada dulmiga, lagu ma caaroone[2]

262) Casiiskii Rasuulkeen ahaa, loo ma caal heline[3]

263) Cadceeddiyo haddii jeer dayaxa, looga rogo caadka

264) Oo calaacalaa loo duldhigo, uma cabiidmeene[4]

265) Xaqu caynka uu yahay marnaba, calal ma siisteene

266) La cadaadi laakiin haddana, laga ma ciidayne

267) Si kastooy cadaawadi lahayd, Carabi may dayne

268) Waa caado gaal lagu yaqaan, taniyo reer Caad.

HIJRADII XABASHA

Hijradii 1aad iyo 2aad ee Itoobiya (Xabasha)

269) Silicaa waxaa looga baxay, inay socdaalaane

270) Sayidkii Axbaashtay[5] damceen, inay siyaartaane

271) Soo jeedintaa waxa lahaa, suubbanii Nebiye

272) Magangeliyo inuu siiyo bay, kala saxeexdeene

273) Sannadkaasi waa kii shanaad, sida ay sheegeene

274) Halkaasay saxaabada badhkood, sebenno joogeene

275) Dabadeed sawaxan baa ka yimi, saba[6] Quraysheede

276) Nimankii sujuudaa la yidhi sanamyo wayntiiye

277) Farxaddii ayey subax labaad, safar u aadeene

278) Seeraha[7] markay joogsadeen, hadalku saafnaaye

279) Soohdintii[8] darbaa galay intay, sabirka doorteene

280) Kuwo kalena way soo noqdeen, Saatir amarkiiye

281) Sannadkii lixaad bay mar kale, dibu sidcaaleene[9]

---

(1) - Awood

(2)- Waxba umay noqon muslimiintu oo diintu way sii fidaysay uun.

(3) – Looma taag helin.

(4)- Uma hoggaansameen.

(5)- Boqorkii Xabasha ee loo yaqaannay Najaashi.

(6)- Deegaankii Quraysheed "Maka"

(7)- Xuduudda Maka.

(8)- Seere

(9)- Safar

282) Raggu waa siddeetane haddaan, saddex u dheerayne
283) Dumarkana siddeed baa u dheer, tobanki soocnaaye
284) Sidaasay mar kale xabashidii, galab salaameene
285) Soo dhawaynna way kala kulmeen, saa'idoo wacan.

ISLAAMIDDII XAMSE IYO CUMAR RC

286) Foolaad Xamsaa soo muslimay, ficil daraaddiiye
287) Fulaygii Abuu Jahal ahaa, feedhka qabadsiiye
288) Shan farood ayaa uu ku dhigay, subax fariidkiiye
289) Dabadeedna waxa foorad dhigay, inanki Faaruuqe
290) Faan bay kacbada soo galeen, fara badnaantoode
291) Fiitoo[1] raggaasaa lahaa, faraci koowaade
292) Fiintii cideediyo waxaa, gaabtay foorida e
293) Faataadhuglayntii[2] la waa, faaxishka ahayde
294) Cumar fiirintiisuu Iblays, fadhaqa tiirshaaye
295) Shaydaanku wuu fiigan jiray, sida finiinkaase
296) Fadalkiisu[3] wuxu gaadhi jiray, meel fogaan badan.

[1]- *Veto*: codka diidmada qayaxan.Waa eray muujiya awoodda ay wax ku muquuniyaan dawladaha xooggani.
[2]- Kibirkii.
[3]- Raad noole oo dhulka qoday ama diisay.

TASHIGII QURAYSHEED

297) Odayadii Quraysheed ayaa, dood abaabulaye
298) Aayado ayey keen dheheen, lagu islaamaaye
299) Webiyaal ordaayeey dheheen, Nebi Alloow keene
300) Ilo wada biyooday dheheen, aaggayaga yeele
301) Noo keen Allaah bay dheheen, waannu aamminiye
302) Aqal dheemmaney keen dheheen, la ashqaraaraaye
303) Cirka aad sallaan bay dheheen, sare u sii raace
304) Eeggana[1] kitaab nooga keen, Eebbe soo qoraye
305) Eray keliya baa lagu afjaray, ararti dheerayde
306) Awooddaasi waa tii Allee, ma laha iinsaane
307) Cutba ina Rabiicaa shir kale, soo agaasimaye
308) Ii daaya buu yidhi anaa, xaajo soo odhane
309) Aqbalnaye waxaa ay dheheen, arrinka maareeye
310) Wuxu yidhi adeer Muxammadow, maanta kuu imiye
311) Waan wada ognahay inaad ahayd, ubax Quraysheede
312) Abtirsiimo adigaa u mudan, idil tolkeennaase
313) Hayeeshee ilaahyadayadaad, eber ku sheegtaaye
314) Aabbeyaashayaad caayeysaa, iyo awoowgoode
315) Imminkana xal baan kuu sidee, ii fur maqalkaaga
316) Aroos baannu kuu dhigi haddaad, ooriddoon tahaye
317) Ayddin[2] baannu kuu raadin iyo, cad iyo iidaane
318) Abbaanduule adigaa ahaan, iyo ugaas wayne
319) Arrin sheego waan kaa aqbali, eraygad doontaaye
320) Ma idlaysay buu Nebigu yidhi, Abul Waliidoowe?[3]
321) Allaylehe wuxuu yidhi wataa, aragtidaydiiye
322) Alfusilat ayuu Nebigu furay, aayadaa hore e
323) Waxoogaa markii uu akhriyey, aadyar soo noqoye

---

[1]- Eegga: waqtiga markaa la joogo; imminka, hadda.

[2]-Noocyada geela mid ka mid ah

[3]- Waa kunyadii Cutba Ibnu Rabiica

324) Iska daaya buu yidhi dadoow, waan idiin digaye
325) Inuu sixir ku taagay dhammaan, odayga sheegeene
326) Maqli mayso dhegta awdantaa, xaqiyo eedaane
327) Mar kalena umuur yaab leh bay, yara ishaareene
328) Ayaantaa waxaa ay dheheen, eex Allaan rabine
329) Ilaahaaga aan caabudnee, keennana addeece
330) "Kaafiruun" ayaa soo degtoo, diidday amarkaase
331) Mar kalay Axbaartii[1] Yuhuud, u irkadeen goore
332) Waydiimo adag bay rabeen, inay abbaaraane
333) Saddex eray su'aalay dheheen, odayadoodiiye
334) Dulqarnayn arbii loo yaqaan, iyo arwaaxdeenna
335) Godka innamadii galay maxay, la irdhanaayeen dheh?[2]
336) Alkahfiyo Israa' baa jawaab, loo aqoonsaday.

GO'DOOMIN

Go'doomintii banii Haashim iyo banii Almuddalib

337) Saddex sano go'doon bay gesheen, gaaliyo islaame
338) Abuu Lahab ayaa garab maroo, diiday gacalkiiye
339) Inta kale goshiibay[3] dhammaan, subax u guureene
340) Gardarrada waxaa lagu xukumay, gurigi waynaaye[4]
341) Saddex sano gasiin ay cunaan, looma soo geline
342) Qof gabbanaya uun baa la yimi, waxay u guuxaane
343) Geedaha ayaa ay cuneen, gaajo waa cadaw e
344) Geesiyaal ayaa diidayoo, gubay waraaqdiiye
345) Gunnimada ma doonayno bay, gole ka sheegeene
346) Abuu Jahal gadoodkii[5] ayuu, maagay guurtida e
347) Inay talo la soo gooyey tahay, buu garwaaqsadaye
348) La guddoon warkaasoo tolkii, loo gargaar noqoye

[1]- Culimadii Yuhuudda.
[2]- Asxaabul kahfi.
[3]- Shicbu Banii Haashim.
[4] - Xaramka.
[5] - Dareen cadho.

349) Gobannimadu waa inaad dulmane, garabka siisaaye

350) Waa inaad gufaysaa halkay, godobi taallaa.

SANNADKII MURUGADA

351) Sannadkii tobnaad[1] wuxu lahaa, sawrac[2] goonniyahe

352) Sarkadhabanka[3] waxa looga dhigay, sabirka awgiiye

353) Sayidkii Abuu Daalib bay, subax xabaaleene

354) Iyo sawjaddii Nebiga ee, saalixa ahayde[4]

355) Murugada waxaa soo wajahay, saami qara wayne

356) Gacal iyo sokeeyaa ka baxay, seerihii Nebiye

357) Saf waxaa usoo galay mar kale, sufahadoodiiye[5]

358) Seeftiyo waxaa loola baxay, sabaradaa qaare

359) Dabadeedna Sawdaa[6] markaa, Suubbanuu helay.

DAA'IF

Safarkii Daa'if iyo soo noqodkii Nebiga SCW

360) Nebigeennu murugada darteed, meel kaluu tegaye

361) Magaalada waxaa uu u kacay, Daa'if marinkeede

362) Markaasuu raggii iyo u tegay, madax-ku-sheeggiiye

363) Cabdi iyo Mascuud iyo Xabiib, meeye buu yidhiye?[7]

364) Mid waliba waxaan qabanin buu, Mawleheen yidhiye

365) Dumar iyo markaasay carruur, dhagax ku miiseene

366) Isagoo madluumuu[8] ka yimi, meheraddoodiiye.

367) Mus ku yaalla beer buu hadhsaday, sayidki miignaaye[9]

---

[1]Waa sannadkii tobnaad ee nebinimada.

[2]- Tilmaan

[3]- Welwel iyo hiyikac ku dhaca qof, arrin la soo deristay awgeed.

[4]- Khadiija

[5]- Maangaab.

[6]- Sawda binti Zamca.

[7]- Cabdiyaaliil, Mascuud iyo Xabiib oo ah ilma Camar Ibnu Cumayr Althaqafi. Waxa ay ahaayeen niman walaalo ah oo deegaankaas madax la qadariyo ka ahaa.

[8]- Dulmane.

[9]- Qof wanaag, geesinnimo iwm kulansaday ahaansho.

368) Mid yaroo miskiinaa u guray, midhihi saarraaye

369) Magac Eebbe goortuu ku cunay, mahadnaq raacsiiye

370) Muxuu yahay warkani buu ku yidhi, maan aqoonjirine

371) La mabsuud[1] Rasuulkeenna oo, maxabbo deeqsiiye

372) Markaasuu magaalada ka baxay, maagis dabadeede

373) Mudanii Jibriil baa la yimi, malaggi buuraaye

374) Mugga adigu amar buu ku yidhi, waan maqlahayaaye

375) Markaasaan magaalada Makaba, mirir ku baabiine

376) Ma rabee ka joog buu ku yidhi, muunadlii Nebiye

377) Manidooda duul baan ka filan, Mawle caabuda e

378) Mudcim[2] buu ku yimi Suubbanuu magantidiisiiye

379) Abaalkaana muu moogganayn, maalinkii Bedere

380) Maxaabiista wuu siin lahaa, Nebigu maamuuse[3]

381) Mawsimkii[4] xajkuu soo bandhigay, muhimaddiisiiye

382) Martidaa Ilaah buu is yidhi, diinta maqashiiye

383) Laga maadsay[5] oo loo malee, sida majnuunkiiye

384) Lixdii reer Madiinaa aqbalay, muran la'aaneede

385) Iyagaa wanaaggiyo mulkiyey, magaci waynaaye

386) Markaasay macaankii tolkood, ugu macneeyeene

387) Nimankii mawaalida[6] ahaa, loo mashxaradeeye

388) Mansab iyo waxaa ay heleen, malabki diimeed.

DHEELMINTII NEBIGA SCW

[1]- Farxad

[2] – Mudcim ibnu Cadi.

[3]- Waxa uu yidhi Nebigu SCW maalinkii Beder "haddii uu noolaan lahaa Mudcim ibnu Cadi, oo uu iga la hadli lahaa dadkan waan uga tegi lahaa" waxay muujinaysaa abaalka uu Suubbanuu u hayey Mudcim, balse gaalnimo ayaa uu ku dhintay xilligaas ka hor.

[4] - Xilligii xajka.

[5] - Qof ku dheeldheelid.

[6]- Waa eray carabi ah oo loo adeegsado addoomaha iyo dadka mudanta ah ba, halkan se waxaa laga wadaa dadkii laga tamarta roonaa ee ay Yuhuudi dhibta ku haysay, iyo guud ahaan carabta oo caalamkaas kaalin liidata kaga jiray.

389) Dheelmintii Rasuulkaa lahayd, dhabannohayskiiye[1]

390) Ka dhaqaaq Makoo wuxu u kacay, dhinac Ilaahay e

391) Dhankaa iyo Aqsuu sii mariyo, dhulalki soocnaaye

392) Isagoo dhan baa tegay siday, culimo dheegeene

393) Dhadhab[2] iyo hurdiyo may ahayn, sheeko dheeh galaye

394) Qaybkiyo[3] waxaa loo dhanbalay, waxaanu dhaadayne

395) Markaasuu dhambaal iyo la yimi, dhaxalka diimeede

396) Lala dhaygag goortu ka yimi, socodki dheeraaye

397) Ma dhabaysan nimankii lahaa, dhoohanaa badane

398) Dheeldheelka waxay ugu dareen, dhib iyo maadayse

399) Abuu Bakarna waa tuu ku dhegay, magaci dhawrraaye[4]

400) Sida dheemmantuu aadamaha, uga dhex soocnaa.

BALLANKII ANSAAR

Baycadii 1aad iyo 2aad ee Nebiga SCW iyo Ansaarta dhexmartay

401) Toban laba[5] barbaar baa la galay, baycadii hore e

402) Ballan xooggan bay kula galeen, buurihii Mina e

403) Bunuuddeedu waxay shaabbeheen, bilista teediiye[6]

404) Muscab binu Cumayr baa u baxay, diinta baristeede

405) Barqa hore waxaa soo muslimay, beelohoo idile

406) Bishaaradana waa kii u diray, baarrigii Nebiye

407) Bilawgii xajkay soo galeen, baydka Xaramkiiye

408) Nimankii burjiga[7] wayn lahaa, booqde Nebigiiye

409) Boqol tiro ku dhaw bay noqdeen, fara badnaantoode[8]

---

[1]-Cajab iyo amakaag.

[2]-Riyo hadal leh oo aan la xusuusan marka la tooso; qarow.

[3] -Cilmul qaybka, waa aqoonta innaga dahsoon ee aynaan arkin ama xog aynnaan ka hayn.

[4]-Maalinkaas ayaa loo bixiyey naanaysta ah Siddiiq; waayo Nebiga ayaa uu hadalkiisa iyo warkii uu sheegay u rumeeyey.

[5] - 12 saxaabi

[6]-*Bunuud*: waa eray carabi ah oo la macno ah qodobbo, waxa looga jeeda ballankii la la galay dumarka ee kusoo arooray aayadda 12aad ee suuradda Al-mumtaxinah. Baycadaas waxa loo yaqaannay baycadii dumarka; sababtoo ah waxay shaabahaysay tii la la galay haweenka.

[7] -Heybad cidi leedahay oo dadka qaarkiis kaga baqaan ama ku xurmeeyaan.

[8] - 73 nin iyo 2 dumar ah ayey ahaayeen.

410) Bartii iyo waxaa lagu ballamay, Mina bankeediiye
411) Badhtamii habeenkay kulmeen, baqasho awgeede
412) Is'afgarad bayaan baa ka dhacay, barako saarrayde
413) Loo beretan oo baycadii, boobe midigtiiye
414) Beerkiyo wadnaha iyo kelyaha, laysu soo bixiye
415) Nebiguna bidhaantii jannada, ugu bushaaree.

HIJRADII NEBIGA SCW IYO SAXAABADA

416) Muslimiinta hagardaamo iyo, hawl umay hadhine
417) Harraad iyo kulayl badan markii, hadhaca loo diiday
418) Hanfigiyo dhibtii ay mareen, hiil Allaa xigaye
419) Hijradii Madiinay heleen, hilinki toosnaaye
420) Halhaleel ayey uga bexeen, loo hamuun qabaye
421) Hantidooda qaar buu la hadhay, cadawgi Haamaane[1]
422) Hanadkii Suhayb[2] baa kuwaa, ugu hanwaynaaye
423) Ka macaash haddana aakhiray, uga horraysaaye[3]
424) Xal inay helaan bay Quraysh, ku hamminaayeene
425) Ku hagaage daartii Nadwiyo,[4] hadhacyadeediiye
426) Habaarqabe Iblays baa isana, hoolka soo galaye
427) U hagoogay taladii haddana, dacal ka haaneedye
428) Odaygii hadlaba maad la helin, haatan buu yidhiye
429) Ku hadaaq Abuu Jahal warkii, loo hamuun qabaye
430) Iblayskina haddaan kaa hayaa, hoobal[5] buu yidhiye
431) Lagu hoyey inay suubbahana, hanaqa[6] gooyaane
432) Haashimina[7] ay siinayaan, halahay doonaane
433) Reer waliba hanad xooggan buu, soo hareer dhigaye

---

[1]- Nin naxariis daran oo xalaal iyo xaaraan isugu mid tahay.
[2]-Suhayb ibnu Sinaan Alruumi.
[3]-Waakii Nebigu ku yidhi "iibkaas waad ku macaashtay Abuu Yaxyoow!"
[4]-Daaru Al-nadwaa, waxay ahayd goobta ay ku shiraan waayeelkii Quraysheed.
[5]- Qof heesaa ah ama jila riwaayadaha. Halkan se waxa looga jeedaa uun eray ammaan ah.
[6] - Dhuunta meesheeda hoose oo godan; galaw; halaw.
[7]- Reer Banii Haashim: waa qoyskii Nebiga SCW

434) Hayeeshee Ilaah baa fashilay, halaqi[1] aasnaaye
435) Ka hijrood Rasuulkaa la yidhi, goor habeennimo e
436) Hortooduu ka baxay gaaladoo, tuban halkoodiiye
437) Hoog iyo khasaaray bartii, kala hulleeleene
438) Abuu Bakar Siddiiq baa hantiyey, Nebiga hooskiiye[2]
439) Isagaa halyey iyo ahaa, wiil hannaan wacane
440) Hoggii qaaru thawr bay galeen, dhawr habeenno ah

SAFARKII NEBIGA SCW EE MADIINA

441) Saddex maalin goortuu godkii, suubbanuhu joogay
442) Maalinkii Isniintay socdaal, sahay u qaateene
443) Kolkii ay sidcaaleen[3] ayey, surin ka leexdeene
444) Jid silloon[4] ayaa ay mareen, socodki dheeraaye
445) Inankii Suraaqaa[5] arkoo, seef ku caydhsadaye
446) Isagana sidii loogu digay, waad la socotaane
447) Subixii warjaaf[6] buu is yidhi, waa siduu rabaye
448) Galabtana sirtooduu asturay, labadi saaxiibe
449) Halkaasay sareedada nimcada, sare u raaceene
450) Maalinkii siddeedaad ayey, soo galeen duhure
451) Sannadada hijrada waa halkii, looga dhigay seese
452) Soo dhawaynta waxa loogu tumay, sacabki sheegnaaye
453) Sanqadhiyo sawaxankay Yathribi[7], sigatay maantaaye
454) Salligiyo takbiirtaa cirkiyo, gaadhay samadaase
455) Dayax soo baxay ugu gabyeen, sabiyadoodiiye[8]
456) Inkastooy sabool qaar yihiin, sooryo may hadhine
457) Salka dhigatay tuluddii iyana, Nebigu saarraaye

---

[1]- Nooc ka mid ah masaska. Halkan se waxa laga wadaa dhib iyo shar.
[2]- Hadhkiisa, waxa laga wadaa waa uu la safray oo dariiqii hijrada ayaa uu wehel u ahaa.
[3]-Waxa ay la mid tahay socdaal.
[4] - Jid aan toos Madiina u tegayn.
[5]- Suraaqa Ibnu Maalik.
[6] - Dil.
[7]- Magac ka mid ah magacyada magaalada Nebiga SCW ee Madiina Almunawarah.
[8]- Waa qasiidadii ahayd طلع البدر علينا

458) Waa sabada reer bani Najaar, soohdintaasina e

459) Halkaasay sacaadada waxyiga, seben ku maaleene

460) Waxa timi iyana Sawda, waa sawjaddii Nebiye

461) Iyo ilma Siddiiq iyo hablii, Suubbanuu dhalaye

462) Waxa hadhay iyana Saynaboo, sayged maanacay[1]

XAALADDII MAGAALADA MADIINA

463) Xaaladdii Madiinaan dulmari, xeer ka soo baxaye

464) Cidda deggani waa xayn Yuhuud, oo xamaas badane

465) Iyo xisbi Islaamoo isana, soo xagaabaxaye

466) Iyo xulafo weli gaalnimada, xuub ku sii hadhaye

467) Waa xertii munaafaqa ahayd, xaajadaasina e

468) Xarakada Yuhuuddaa lahaa, xaasidiin badane

469) Xiqdigaa u wacan inay kuwani, xaqa ka koodaane

470) Xaaddaa ka badan maalmahay, xagal ka daacsheene[2]

471) Xabiibkii Rasuulkay dheheen, xawda[3] soo jara e

472) Waa nimanka xaaraanta iyo, aan xalaal bixine

473) Xanta iyo xasaradday yaqaan, xilalka shaydaane

474) Xoolaha magaalada ayey, wada xisaabshaane

475) Carabtuna xayeesh bay noqdeen, laga xabbaadhaaye[4]

476) Xerta ina Saluul baa iyana, xulayey meeshaase

477) Waa niman xariiftamahayoo, hoos ka xoogsade

478) Xanaftiyo dareenkay intaa, xiise geliyaane

479) Xanbuska[5] iyo xaabada ayey, xolodka[6] saaraane

480) Xanuun baabay ugu sii daraan, meel xummadi taale

481) Waa duul xumaantiyo ka hela, xaaluf iyo qiiq.

---

[1]- Ninkii qabay ee Abul-caas ayaa u diiday safarka. Balse dagaalkii Beder dabadii ayaa ay soo hijrootay kaddib markii ninkeeda lagu qabtay maxaabiistii Beder oo uu Nebigu SCW arrinkaas kula ballamay.

[2]- Dhibaateeyeen.

[3]- Nafta.

[4]- Dulmi iyo dhac bay Yuhuuddu ku hayeen.

[5]- Jiq ka samaysan ood ama dhir yaryar; xas.

[6]- Qori dab leh.

SHAQADII UGU HORRAYSAY EE MADIINA

Dhisiddii Masjidka Nebiga SCW, walaalayntii Muhaajiriin iyo Ansaar iyo sidoo kale heshiiskii la la galay Yuhuud:

482) Magaalada Rasuulkeennu waa, mahurtadeenniiye

483) Markii Nebigu soo galay ayey, noqotay meel wayne

484) Waa muqaddas ruuxii dambiga, maanka geliyoowe

485) Masjidkii Rasuulkaa kuu yaal, magaca waynaaye

486) Muslimiintu goortay dhiseen, noqoy mahiigaane[1]

487) Waa meesha khayrkiyo wacdiga, laga he maalaaye

488) Madaxtooyo weeyaan ra'yiga, lagu he meershaaye

489) Masaakiinta aan hoy lahayn, waa midkay degiye

490) Munkarkiyo macaasida ayaa, lagu mamnuucaaye

491) Martidiyo ciddii soo gashaa, lagu macsuumaaye

492) Tala murugtay bay culimadiyo, madaxdu sheegaane

493) Markaasay mushaawaro[2] galaan, lagu mabsuudaaye[3]

494) Macnayaashu waagaa lahaa, ma laha maandhoowe

495) Muhaajiriin dhiggoodii Ansaar lala mataaneeye

496) Meel kaliya bay wada degeen, maxabbo awgeede

497) Marwaa laysu furi gaadhay iyo maal la qaybsado e[4]

498) Iimaanku meeshuu dhexgalo, mililka[5] daaweeye

499) Mar kaleeto nimankii Yuhuud, Nebigu maareeye

500) In Madiina ay daafacaan, marag Alle u yeelye

501) Waa niman musiibooyinoo, ma laha iimaane

502) Ma la fuliyey mise way jebsheen, waa mid ii dihin.[6]

---

[1]- Wax tiradoodu aad u badan tahay sida: roobka iyo colka, halkan se waxa laga wadaa goob muhim ah oo caalamka oo dhan looga yimaaddo.

[2] - Tashi.

[3]- Lagu farxo.

[4] - Sidii uu sameeyey Sacad ibnu Rabiic markii lala walaaleeyey Cabdirraxmaan ibnu Cawf. RC

[5]- Dheecaan malax iyo dhiig isugu jira oo ay nabarrada hurgumaa yeeshaan. Halkan se waxa laga wadaa colaadda iyo naxligeeda.

[6]- Saddexdii qolo ee Yuhuudda ka degganaaba way jebiyeen ballankaas.

KA HOR DAGAALKII BEDER

503) Odaygii Saluul baa is yidhi, Nebiga suuldaare[1]

504) Sababtana Quraysh baa lahayd, sarakacoodiiye

505) Isagana sidii loogu digay, jooji socodkiiye

506) Salka dhigay ninkaasoo haddana, saafi muu noqone

507) Muslimiinta seeftaa la faray, inay samaystaane

508) Ooy sare u qaadaan sharciga, sannadki koowaade

509) Sayful-baxar Kharraar iyo Abwaa', sariyadii Raabiq

510) Subixii Cushayriyo Buwaad, waranku seeraaray

511) Iyo tii Safwaan iyo Nakhlee, gaalku siganaayey[2]

512) Waa seben adkaayoo Quraysh, sahanku saarraaye

513) Safarrada jidkaa soo maray, sabaradeeyeene[3]

514) Waa saami ay horu galeen, saadadii Mudare[4]

515) Iyaguba sidii ay faleen, waad la socotaaye

516) La soofee xaqii ay in badan, sacabka saareene

517) Sixirkuba marbuu kii lahaa, sare u raacaaye

518) Sun ninkii walaaqana mar bay, tiisa sababtaaye

519) Seedaha mar buu kala jaraa, soodh ninkii tumaye

520) Bal la soco sidii loogu galay, saaxadii[5] Beder

DAGAALKII BEDER

521) Waa ceelka Beder meesha ay, cadawgu eedeene

522) Caaddaa ka badan tirada ay, cudud u keeneene[6]

523) Toddobaatan cooflaa[7] ku go'ay, cararra waa muushe[8]

524) Toddobaatan kale ciidankaa, soo cabiidsadaye[9]

---

[1]- Cid jillaafayn

[2]- Waa duullaamo yaryar oo Nebigu saxaabada u diray oo ku wajahnaa badankoodu Quraysh iyo safarradeeda.

[3]- Tib bir ah oo dhinac fiiqan leh oo ceelasha iyo dhulka adag lagu qodo.

[4]- *Saado*: madax, *Mudar*; waa mid ka mid ah qabaa'ilka Carbeed, oo ay Qurayshi ku abtirsato.

[5]- Goobta.

[6] -Tiro kun nin ku siman bay keeneen gaaladu, halka ay Muslimiintu ahaayeen saddex boqol iyo waxoogaa.

[7]- Duqaydii iyo waayeelkii Qurayshеed ayaa laga wadaa.

[8]- Tiro badan.

[9]- Maxaabiis ahaan baa loo qabtay.

525) Cifriidkii[1] Abuu Jahal ahaa, dile carruuruuye[2]

526) Cabdillaahigii ina Mascuud, cunaha soo gooye

527) Cartankii[3] halkaasuu ku jabay, cadhadu saarrayde

528) Cutba ina Rabiicaa la dilay, caaqilkii Mudare

529) Colka inuu dabbaaluu damcaye, waa la caasiyaye

530) La caree se laakiin libaax, jeel qabaa cunaye[4]

531) Shaybiyo Waliidkii carrada, lagu la ciideeye[5]

532) Ina Khalafka[6] caaqii ahaa, celi Bilaalkiiye

533) Ina Cawf[7] ayuu magansadoo, loo cafiyi waaye

534) Ceebtiisa waxa seef ku dilay, kuu cabiidsaye

535) Ninkii Nebiga soo caayey iyo, Nadar[8] cadaab aadye

536) Cad yar baa ka hadhay gaaladii, camadhka[9] waynayde

537) Carrabkuun ka qiray ina Saluul, casarki tawxiide

538) Cindigiisa[10] kama soo bixine, wuu cabsaday uune

539) Cisigii Ilaahiyo mar kale, curatay guushiiye

540) Cagta saare gaalkii in badan, ceesh ka maanacaye

541) Calankooda sannadkii labaad, ciid la hoos geliye

542) Nabsigii cirkaasuu ka yimi, ciilka loo qabaye

543) Cashar iyo cibaaray u noqon, caalamkoo idil

---

[1]- Jinka nooc ka mid ah oo xooggan. Halkan se waxa laga wadaa qof dhib badan.

[2]- Laba wiil oo Ansaar ahaa ayaa wada dilay.

[3]- Kibirkii.

[4]- Xamse Ibnu Cabdilmuddalib ayaa dilay. *Jeelid*: dareen rabitaan oo ku abuurma xoolaha marka ay waayaan dhanaan "cusbo"

[5]- Cutba Ibnu Rabiica, walaalkii Shayba Ibnu Rabiica iyo wiilkiisii Waliid Ibnu Cutba Ibnu Rabiica ayaa hal goob lagu wada dilay.

[6]- Ubaya Ibnu Khalaf

[7]- Cabdiraxmaan Ibnu Cawf

[8] - Alnadar ibnul Xaarith, markii duullaanka laga laabtay ayaa la dilay.

[9]- Qof gaboobay

[10]- Kashiisa, qalbigiisa.

KA HOR DAGAALKII UXUD

544) Raggii Beder la daandaanshay baa, soo dagaal tegaye

545) Dil qorshaysan bay kula kaceen, Nebigi Daahaaye[1]

546) Soo dire Cumayr[2] oo ahaa, daallin hawl badane

547) Laga bixi wixii dayn ahee, dusha ka saarraaye

548) Ubadkiisa daar hadhac leh baa, daaha loo sudhaye

549) Dabadeed Madiinuu la yimi, damaci waallaaye

550) Duuduub warkiibaa waxyiga, loogu daahrogaye

551) Dar Ilaahay waakii muslimay, Daa'in amarkiiye

552) Duulkii Yuhuud ugu xumaa,[3] debedda loo saarye

553) Dabinkay xidheen baa iyana, dooxay ubucdoode

554) Laga didi darkii ay in badan, damal ka yeeleene

555) Dulli buu Ilaahay u qoray, dabargo'oodiiye

556) Qaswadii Sawiiq baa dulmiga, loo durbaantumaye

557) Duqii Abuu Sufyaan baa isana, dooxa soo galaye

558) La dabbaal colkiisoo markaa, daadi sahaydiiye[4]

559) Diibkii[5] timaa loo marshaa, dooxay kii Kacabe[6]

560) Damiin[7] inuu ahaa bay u tahay, shay daliil gala e

561) Aflagaaddaduu daa'imaa, loogu daw galaye

562) Duullaanna waxa loo dalbaday, dahab Quraysheede

563) Dirham boqol kunaa laga qabsaday, dakharki waynaaye

564) Dagaalyahannadii soo dhacsaday, dooge[8] galabtaase

565) Deeqdii Ilaah baa u timi, diin u dirirkii.

---

[1]- Mid ka mid ah magacyada Nebiga SCW sida ay culimada qaar qabaan.

[2]- Cumayr Ibnu Wahab, waxa soo diray Safwaan Ibnu Umaya oo ka dalbaday in uu Nebiga SCW soo dilo.

[3]-Banuu Qaynuqaac.

[4]-Sahayda uu daadiyey waxa loo yaqaannay sawiiq, waana ta duullaanka loogu magic daray.

[5]-Cadar.

[6] -Kacab ibnul Ashraf.

[7]-Qof fahmadiisu yar tahay.

[8]- Barwaaqayste.

DAGAALKII UXUD

566) Ma illaawin nimankii Quraysh, aanadii Bedere

567) Umalkii[1] raggaa helay ku reeb, uurkutaallada e[2]

568) Aargoosi bay doonayeen, aayatiin kale e

569) Col aloosan waxay soo tubeen, buurihii Uxude

570) Saddexdaa kun waxa loo igmaday, Abuu Sufyaankiiye

571) Isagaa abbaanduule iyo, oday ku sheegnaaye

572) Nebiguna taluu kula irkaday, idil raggiisiiye

573) Bal arrimiya waatuu ku yidhi, ehelu khayrkiiye

574) Dhufayskaa Madiinay ahayd, aragtidiisiiye

575) Aan gudaha daafaca galluu, aad u soo dhigaye

576) Hayeeshee asxaabtii badh baa, ayga doorbidaye[3]

577) Ku addeec Rasuulkuna raggaas, aragtidoodiiye

578) Kun nin baa ayaantaa u baxay, aagaggii Uxude

579) Saddex meel mid buu kii Iblays, aayar baacsadaye

580) Ina Ubaya waakii la tegey, duul ayaandarane[4]

581) Intii soo hadhaa diinta iyo, Eebbe doorbidaye

582) Ka adkaade gaalada markay, amarka qaateene

583) Kontonkii nin baa adhaxjabkiyo, keenay urugtiiye[5]

584) Saciid Ina Jubayr iyo waxaa, diiday toban aare

585) Dhufayskay banneeyeen ogaa, ina Waliidkiiye[6]

586) Ku asqee awood aad u badan, Abu Sulaymaane[7]

587) Una yeedh intii carartayeey, ehel wadaageene

588) Lagu aabudh edeggii yaraa, idil islaamkiiye

589) La idlee raggii Suubbanuu, soo abaabulaye

---

[1]- Cadho.

[2]- Dareen iyo uurxumo gocasho ku dheehan tahay.

[3]- Rag ka mid ah saxaabada oo u badnaa raggii aan Beder xaadirin ayaa ku adkeeyey Nebiga SCW in uu bannaanka ugu baxo cadawga.

[4]- 300 oo ka mid ah ciidankii ayaa waxa la laabtay Cabdillaahi ibnu Ubaya ibnu Saluul.

[5]- *Urugo* tiiraanyo, waa raggii uu Nebigu SCW saaray buurta loo yaqaan jabalu-rumaat, waxay khilaafeen amarkii Nebiga SCW oo way kasoo degeen buurtii.

[6]- Khaalid ibnu Waliid.

[7]- Waa kunyada khaalid.

590) Isagana wixii nabar ku dhacay, waad ogsoon tahaye

591) Ilkihiisa qaar bay jebsheen, edebxumaantoode

592) Umadduu hanuunkaw wadaa, eedahaa falaye

593) Ma aflaxo ninkii Nebi Ilaah, gacan u qaadaaye

594) Ibnu Qami'a waa kii is yidhi, eebo[1] qabadsiiye

595) Iga qabo ayaa uu ku yidhi, aadunkaasina e[2]

596) Adyad buu u dilay Ina Cumayr[3], Nebi u eekaane

597) Afmuggii intuu qayliyuu, beenta aamminaye

598) Orgi uu isagu leeyahaa, aakhirkii dilaye

599) Asadkii Ilaah bay dileen, maalinkii Uxude[4]

600) Waxshibaa adduun dhaafsadoo, dooxay ubucdiiye[5]

601) Ooridii abbaanduulahaa,[6] fadhatay uurkiiye

602) Unuunkay jareen maalinkaa, ina Xaraamkiiye[7]

603) Waa Jaabir aabbihi ninkii, Eebbe qaabbilaye

604) Nin Usayrim loo garan ogaa, waa ab goonniyahe

605) Ashahaad markii loo qabtuu, aaday gaalada e[8]

606) Udgoonkii jannuu helay markuu, doortay aakhiro.

KA HOR DAGAALKII AXSAAB

607) Boolaxooftadoodii[9] la saar, Bani Nadiirkiiye

608) Magtii looga baahnaa ayey, badiba diideene

609) Ballankii raggaa lala galaa, qeexay bixintaase

610) Bannaankaa dhammaan looga guray, bandarradoodiiye

611) Badh baa Shaam u sii kicitimoo, baadiyaa maraye

612) Badhna waa kuwii Khaybar degay, berisamaadkiiye

---

[1]- Waran.

[2]- Daallin.

[3]- Muscab ibnu Cumayr RC.

[4]- Xamsa ibnu Cabdilmuddalib

[5]- Uurkujir

[6]- Waa xaaskii Abuu Sufyaan, magaceedu waa Hinda binti Cutba, iyada ayaa ka dalbatay Waxshi in uu Xamse dilo, waxa ay uga aaraysay dilkii aabbeheed, adeerkeed iyo walaalkeed.

[7]- Cabdillaahi ibnu Xaraam.

[8]- Waa saxaabi maalinkaas soo islaamay oo haddana isla maalinkaaba shahiiday.

[9] - Faan iyo hanjabaad been ah oo cid loo jeediyo

613) Bunduqii[1] dagaalkoo dhan bay, dhan uga baydheene
614) Badarkiyo waxay sii rarteen, baradhadoodiiye
615) Waxay sii burburiyeen iyana, barandayaashiiye
616) Xashribaa[2] bayaankood ku yaal, baho Yuhuudeede
617) Banuu Asad raggii loo diraa, baacsadoo helaye
618) Basar bay u yeeleen markay, biraha saareene
619) Bi'rigii[3] Macuunaa isana, bahalo joogeene
620) Toddobaatan buunay[4] dileen, baraha diimeede
621) Bil baa loo qunuudoo habaar, beerka lagu gooye
622) Waxyigaa isana baaq la yimi, barako saarrayde
623) Shuhadadu bishaaray jannada, bilan ka keeneene
624) Inay Eebbe baarriya heleen, baabka lagu sheegye
625) Bedertii labaad baa iyana, loo bannaan baxaye
626) Ballankaasi waa kii ka dhacay, buurihii Uxude
627) Hayeeshee waxaa baqay raggii, baadilkaa wadaye
628) Baroortuna waxay noqotay uun, baahidaa darane
629) Nin busaarad haysaa ma galo, beretan goobeede
630) Barakaalihii Nebi isagu, baaqanwaa abide
631) Bartii loo asteeyuu u tegay, inuu baduugaaye
632) Billad iyo wanaag baa halkaa, loo buraanburay

DUULLAANKII AXSAAB IYO QURAYDA

633) Qaswadii Axsaab baa lahayd, qaab la yaab badane
634) Qabanqaabadaa waxa lahaa, qolo Yuhuudeede
635) Quraysh iyo waxay soo tubeen, qoysas fara wayne
636) Qiyaastii waxay soo heleen, toban kun Qayrroowe
637) Godkii ay saxaabadu qodeen, qabay colkoodiiye
638) Qorshahaa Salmaan baa lahaa, qaarigii Furuse[5]

[1] – Hubkii.
[2]– Suuradda Alxashri.
[3]– Ceel
[4] – Aqoonyahan.
[5]– Salmaan Alfaarisi.

639) Qadoodiga[1] ayaa lagu qodiyo, tacab la quudhaaye

640) Waxay soo qamaamaan[2] indhaha, saare qaxar wayne

641) Cadhadiyo qaloombiga ayey, qamandhacyoodeene[3]

642) Quwaddii halkaasay dhigeen, qarada waynayde

643) Saxaabada qarkoodii haddaan, qodob ka faalleeyo

644) Qalbiyada badh baa soo hinqaday, qarawga awgiiye

645) Qadhqadhkiyo gariirkay kelyuhu, qarash u baahdeene

646) Qamuunyeysigaa soo batiyo, qalabka shaydaane

647) Qolaa yuustay qaar baa shakiyey, inina waa quuse[4]

648) Ragna qiimihii uu lahaa, sare u sii qaadye

649) Rag Quraanku sheegaa jiroo, fuliyey qawlkoode[5]

650) Qatanaan rag badan gaajadii, dhabarku qaansowye

651) La qabooji maankoo ku dege, qawda dhagixiiye

652) Qasnadaha adduunkay arkeen, qasriyadii Shaame

653) Nimankii Quraydaa iyana, maray qarkoodiiye[6]

654) Qardajeexe[7] ballankay mar hore, qalin ku duugeene

655) Qalalaasihii ay damceen, madhi qudhoodiiye

656) Waa qaalin buubaal[8] ah kay, qabada[9] saareene

657) Qareenkii Nucaym[10] baa dhex dhigay, qaraxi waynaaye

658) Qaddarkaasi wuxu soo afjaray, qababacdoodiiye

659) Qiiradii dhextaalliyo la waa' , naf isu quudhkiiye

660) Qoomamo ayaa laga dhaxliyo, qaylo iyo buuqe

661) Dibu qaxe kuwii maagganaa, waxay qafaashaane

---

[1]- Qatanaan.

[2]- Soo socdaalaan.

[3]- Jidhidhico.

[4]- Nimankii Munaafiqiinta ahaa ayaa ka shakiyey diinta oo cudurdaarro beenabuur ah la shir yimi.

[5]- Sacad ibnu Mucaad.

[6]- Raacay gaaladii isbahaysiga.

[7]- Ka leexde jidkii toosnaa ee lagu ahaa heshiiska,.

[8] - Rati layli ah oo aan weli rar baran. Halkan se waxa laga wadaa in ay talo aan laga baaraandegin ku hawlgaleen, dabadeedna sidii qaalin buubaal ah ay rarkoodii iyo baylahdoodiiba burburiyeen.

[9] - Weel qabo ka samaysan.

[10]- Nucaym ibnu Mascuud Althaqafi, waa ninkii u kala dabqaaday Quraysh iyo Qurayda ee isku diray, ilaa ay kala shakiyeen

662) Nimankii Quraydana sharcigu, xeerka qabadsiiye
663) Qaangaadh laboodkii ahaa, qalatay seeftiiye
664) Qaniinyada farii bay cuneen, tacab qasaarkii.

KA DIB DAGAALKII AXSAAB

665) Markii xulafadii reer Axsaab, xididka loo siibay
666) Ee xaasidiintii Yuhuud, xawda[1] laga gooyey
667) Ibnu Abil Xuqayq[2] baa la dilay, siday xaqiijeene
668) Isaguba xigtuu kula ahaa, xumaha qaarkoode
669) Waa taajirkii reer Xijaaz, xiisahaw qabaye
670) Xertii reer Ansaar baa heliyo, xisbul-islaamkiiye
671) Xurmadlii Thumaamay[3] qabteen, xayn saxaaba ahe
672) Sayidkii Xaniifuu ahaa, dhabar xadiidkiiye
673) Saddex maalin buu ugu xidhnaa, xarunti waynayde[4]
674) Dabadeed xor baa laga dhigiyo, xaaji oo kale e
675) Isaguna xaggii beeruhuu, xulay dhankoodiiye
676) Isagoo xaqdoonuu u yimi, ammin Xabiibkiiye[5]
677) Iyaguna xertii ina Jarraax,[6] xeebahaa mara e
678) Dabadeedna xuud bay heleen, xeeligaa yimiye
679) Xaydhiisa waatay in badan, xaadda mariyeene
680) Xuduudaha Madiinay sugeen, xarako tawxiide
681) Mooryaanna xeer bay warmaha, ugu xarriiqeene
682) Nin kastoo xishoon waayey, bay xero ku oodeene
683) La xurmee raggii aan lahayn, hub iyo xeegaan[7]

[1]- Nafta.
[2]- Salaam ibnu Abil Xuqayq.
[3]- Thumaama ibnu Uthaal.
[4]- Masjidka Nebiga SCW.
[5]- Nebiga SCW.
[6]- Abuu Cubayda Caamir ibnul Jarraax.
[7]- Xidhiidh ixtiraam ku dheehan yahay.

DUULLAANKII MURAYSIIC

684) Duullaankan waxa keensadoy, werisay taariikhdu

685) Waa ina Diraarkii[1] sharkiyo, waday kacdoonkiiye

686) Wadnahaa gariiroo ka carar, waranki goobtaase

687) Warsantii Juweeriya[2] meheri, Nebigi waynaaye

688) Wanaaggay saxaabadu faleen, waad ogsoon tahaye

689) Way wada xoreeyeen kuway, ehel wadaageene

690) Waraabii munaafaqu ma dayn ,wadhafyadiisiiye[3]

691) Wacad buu ku maray inuu ka bixin, Nebiga waabkiiye[4]

692) Dabadeedna waatii isaga, waaran[5] loo jaraye

693) Ee debed wareeg uu ka dhigay, wiilki[6] uu dhalaye

694) Caa'ishoo warmoogay iyana, waxun ku sheegeene

695) Kuna wiirsay[7] oo ina Saluul, weheshay beentaase

696) Waaxdii cuslayd buu lahaa, oo waxyigu sheegye

697) Isagana cadaab aad u wayn, laga waraabsiiye

698) Quraankuu waciidkani ku yaal, taniyo waagiiye

699) Warsan weedhsan waa tii la yidhi, waafi baad tahaye[8]

700) Wax ma yeelin ee wuxu u tolay, darajo waynayd

KA DIB MURAYSIIC

701) Ina Cawf[9] ayaa loo dalbaday, duulki reer Kalabe

702) Waa duumadii Jandal halkay, degeshanaayeene

703) Dacwaddii ku fidi oo muslime, Daa'in idankiiye

704) Dumarkana middii ugu mudnayd, daar cad loo geliye

---

[1]- Alxaarith ibnu Abii Diraar.

[2]- Juweeriya bintil Xaarith ibnu Abii Diraar.

[3]-Tuuryeyn iyo aflagaaddo.

[4]- Madiina.

[5] -Warqad ay maxkamaddu ku oggolaato qof in la xidho ama in la baadho. Halkan se waxa laga wadaa hanjabaaddii uga timi wiikiisa oo ugu hanjabay in uu isaga saari doono.

[6]- Inankiisii Cabdillaahi oo ahaa saxaabi wanaagsan

[7] - Ku digasho.

[8]-Waxa loo jeedaa Caa'isha.

[9]- Cabdiraxmaan ibnu Cawf.

705) Duqii maamulaayaa dhaliyo, diraci waynaaye
706) Waa dardaarankii uu ku yidhi, Nebigi Daahaa e
707) Cali waati loo diray isana, daarihii Sacade
708) Laga didi waxay duunyo iyo, dahab lahaayeene
709) Duul Curaniyiinaa iyana, diinta caasiyaye
710) Dulmigay galeen waa kuwii, geeljiraa dilaye
711) Indhahay kasoo daadiyeen, duhurki maantiiye
712) Dabadeedna waxa ay dhaceen, deeblihii[1] Nebiye
713) Iyagana darkii ay qodeen lagu dul googoo.

CUMARATUL XUDAYBIYAH

714) Sannadkii lixaad bay ahayd, oo lillaahiyahe
715) Riyaa lagu tusoo Suubbanaha, looga yeel faraxe
716) Liibaanayaashii muslimay, laxawgu[2] saameeye
717) Lubbigay[3] gesheen inay kolkaa, xaramka laacaane
718) Ledi waaye laakiin se way, labaligdoodeene[4]
719) Leebkiyo warmaha aayar bay, go'a ku laabeene
720) Laagaha Xudaybiya ayey, leexa kiciyeene
721) Waxay soo lalaan geesiyada, xaramka loo diidye
722) Heshiiskii la galay la isku raac, labada geesoode
723) Inkastooy lur[5] moodeen haddana, looxa lagu duugye
724) Iska laabta iyo waxa la yidhi, looga xoolaha e
725) Liqi waaye hadalkaa raggay, luguhu daaleene
726) Marku Nebigu awrkii legday, luqunta gooyeene
727) Libin bay ahayd iyo mid aan, laaxin[6] loo arage
728) Sannadkii labaad bay kacbada, laabta geliyeen[7]

---

[1]- Geelii Nebiga SCW.
[2]- Kaar iyo xanuun, meel gaar ah oo jidhka nafleyda ka mid ah dareemo.
[3]- Qalbiga.
[4]- Hurdaa kusoo dhici wayday oo xiise dartii ayaa ay marba dhan isu rogayeen.
[5]- Dhib.
[6]- Gef.
[7]- Sannadkii kaas ku xigay oo ku beegan sannadkii 7aad ee hijrada.

FARRIIMIHII BOQORRADA

729) Mundir[1] iyo Najaashiyo[2] muslime, laba mataanoode

730) Muluuktii Cummaan[3] weeye iyo, mudanayaashoode

731) Camar[4] baa dedaalkaa baxshooy, mahadin doonaane

732) Masar kii ku noolaa[5] isana, Nebiga maamuusye

733) Maariyuu[6] u soo dhiibay iyo, mudanti Siiriine[7]

734) Ma muslimine xaqa wuu ogaa, maliggi[8] reer Ruume

735) Mulkigiisa waatuu is yidhi, yaan lagaa madhine

736) Midkii Faaris[9] maamuli jiraa, meel xun loo wadaye

737) Loogama horrayn maalintuu, maagay Nebigiiye

738) Laga qaad wuxuu maal tabciyo, magaci waynaa.

DUULLAANKII AL-QAABAH

739) Geel foofay baa ay dhaceen, Banii Fasaarkiiye

740) Salamaa[10] ka fiijiyey halkay, yara fadhiistaane

741) Foolaadku waxa uu ahaa, faraska caynkiiye

742) Firxadkii ayaa ay qubeen, qalabki fiicnaa.

DUULLAANKII KHAYBAR

743) Bisha Muxarram sannadkii todoba, waranku seeraarye

744) Siliciyo musiibada raggii, keenay loo socoye

745) Siddeedii gidaar iyo la jiidh, sarihi dheeraaye

746) Waa sagaashan maydkoodu iyo, saddex kaloo dheere

---

[1]- Mundir ibnu Saawaa, boqorkii Baxrayn.

[2]- Boqorkii Xabashida, Asxama ibnul Abjar.

[3]- Jayfar iyo Cabdi oo ahaa ilma Julandi.

[4]- Camar ibnul Caas.

[5]- Al-muqawqas, boqorkii Masar.

[6]- Maariya Al-qibdiya, Ibraahiim ayaa ay Nebiga SCW u dhashay.

[7]- Siiriin, waxa uu siiyey Nebigu SCW Xasaan ibnu Thaabit.

[8]- Boqorkii loo yaqaannay Hiraqla.

[9]- Kisraa.

[10]- Salama ibnul Akwac.

747) Baaqigii sidcaalaa la yidhi, sixir Yuhuudeede

748) Wax soo saarka beeraha ayey, sebenno joogeene

749) Cumar baa safeeyoo eryaday, Saatir amarkiiye

750) Safiyay[1] u hooyeen iyana, Suubbanii Nebiye

751) Saxaabadu waxaa ay heleen, xoolo saa'idahe

752) Xaaskii Salaam[2] baa la timi, hilib sumaysnaaye

753) Marku Nebigu ilig saaray buu, sheegay sirihiiye

754) Sababtiisa waatuu u go'ay, subax isniinaade

755) Saynabtaana waatii qisaas, tiirka loo sudhaye

756) Nin saxaabiyaa[3] loo qabsaday, oo suntii liqaye

757) Sidaasaa Yuhuuddii Xijaaz, seefta loo baraye

758) Halkay siidh ku beeraan shar bay, sahaminaysaaye

759) Waa qoom sidoodaba Iblays, saaray heeryada.

DUULLAANKII DAATU AL-RIQAAC

760) Saddex garab ayaa ugu adkaa, gaaladii Huwane[4]

761) Guutada Qurayshiyo Yuhuud, gobollo mooryaana

762) Garka[5] waa kuwii jaray Yuhuud, gelin horaadkiiye

763) Ballan adagna waa kuwa la galay, guri Quraysheede

764) Gartood weeye mooryaan inay, gacan u qaadaane

765) Qadafaan geddoodiyo Thaclaba, galab u heenseeye[6]

766) Goortay libaaxyada arkeen, gaabshe socodkiiye

767) Goobihii cadaawahay dhammaan, wada gufeeyeene

768) Dabadeedna gees iyo ka gees, laysu kala goosh.

---

[1]- Safiya binti Xuyeyi.

[2]- Xaaskii Salaam ibnu Mishkam, oo magaceedu ahaa Saynab binti Xaarith.

[3]- Bishri ibnul Baraa ibnu Macruur.

[4]-Gaahaanbuurtii dagaalkii Axsaab wada socotay, Quraysh, Qadafaan iyo wixii la socday iyo sidoo kale nimankii Yuhuudeed.

[5] - Wadnaha intiisa adag oo baruurta yeelata.

[6] - Qadafaan iyo Thaclaba waa laba qabiil.

CUMRATU AL-QADAA

769) Ballankii kalkiisii u bexe, baytullaahiga e

770) Barbaar laba kun weeyaan haddaan, baroba dheerayne

771) Bismillleeye oo waxay guteen, camalki buurraaye[1]

772) Bereteme kolkay marahayeen, guriga baashiiye

773) Baqageliye gaalada markay, socodka boobeene

774) Bidhaantooda waxay moodayeen, duul bukaan helaye

775) Booddada awoodday tuseen, baha Quraysheede

776) Beentay rumaysteen runtii, lagaga baabiiye

777) Nebigana kolkaa loo binee,[2] bilanti Maymuun[3]

DUULLAANKII MU'TAH

778) Intii Nebigu noolaa ma jirin, goob la jaad ahiye

779) Jihaad yaab leh iyo waxay ahayd, jilibdhig duullaane

780) Jihaday qabteen waa dhankaa, janannadii Ruume

781) Laba boqol kun oo jeeniqaar, jeerkan qaabile e

782) Jannadoonayaal saddex kunaa, jiidhay cadawgiiye

783) Jacfariyo[4] ninkii Zayd[5] ahaa, jeexe maalaha e

784) Sooma jeestihii Ina Rawaax,[6] cadawga jeebbeeye

785) Iyaguba jacaylkii Allay, dhabu la jeeleene

786) Dabadeed jidkii aakhiray, jamac ku aadeene

787) Khaalid binu Waliid baa jirrabay, jarakudaaqiiye[7]

788) Jugta waranka iyo waa ninkii, jebiyey seefaaye

789) Jiidaha ayuu kala beddelay, gacalku joogeene

790) Jabhad xooggan waatuu ka dhigay, iyo jamaahiire

---

[1]- Cumradii.

[2]- Loo dhis.

[3]- Maymuun binti Xaarith

[4]- Jacfar ibnu Abii Daalib

[5]- Zayd ibnu Xaaritha

[6]- Cabdiilaahi ibnu Rawaaxa.

[7]- Faras jarekudaaq ah. Halkan se waxa laga wadaa maamulkii duullaanka.

791) Dabadeedna jeeraaradii[1], jeeste cadawgii

FURASHADII MAKA

792) Maka seereheedii la furay, sannad siddeedaade
793) Sababtuna waxaa ay ahayd, amarkay seegeene
794) Banii Bakar ayey seefta iyo, qalab ba siiyeene[2]
795) Iyaguna Khuzaacay sarwaan[3], subax u qaateene
796) Sujuuddiyo rukuucday warmaha, sadarka[4] dooxeene
797) Dabadeedna Nebigay sirtii, dhab ugu saafeene
798) Suugaan ayey kula hadleen, Suubbanii Nebiye
799) Isaguna sarbeeb buu ku waday, saacadii hore e
800) Toban kunoo saxaabo ah ayuu, keenay sabadiiye
801) Dab la shiday saqdii dhexe ayey, wada siraadeene
802) Salbabakhe raggii waayo badan, ubaxu saarraaye
803) Sayidkii Quraysheed ayaa, siidhigaw tumaye
804) Waa Abuu Sufyaan oo u sheeg, tii la soo faraye[5]
805) Sanamyadii kacbada yaallay bay, nabarka saareene
806) Saddex boqol sitiin baa ku jiray, oo siyaado ahe
807) Figta sare Bilaal baa u baxay, oo salaan diraye
808) Sawdkiisa goortuu addimay, saani loo garaye
809) Raggii silica baday maalma hore, seeto loo tidicye
810) Seedaha raggii jaray Islaam, saamax loo fidiye
811) Nebi Yuusuf sidu yeelay buu, Suubbanuu falaye
812) Toban iyo sagaal maalin buu, joogay saaxada e
813) Sidcaalkii hijrada maalinkaa, lagu he seeteeye

---

[1] - Orodkii.

[2]- Banii Bakar waxa ay xulafo la ahayeen Quraysh, halka Khusaacana ay xulafo la ahaayeen Muslimiinta.

[3] -Ul yar oo dhuuban.

[4]- Laabta.

[5]- "Qofka guriga Abuu sufyaan, xaramka ama gurigiisa gaarka ah gala waa aammin" ayaa ay ahayd farriintu.

814) Safarkii Madiiniyo dhammaa, camalki soocnaa.

DUULLAANKII XUNAYN

815) Dooxada Xunayn baa ahayd, dirirti goobeede

816) Kuma deeqin farihii badnaa, guulo daahira e

817) Markii damacu yara qaaday bay, dibu wareegeene

818) Daafaha adduunyada ayaa, diiqad loo dhigaye

819) Deganaansho goortay heleen, dooxe cadawgiiye

820) Dabadeedna cararkii ku gale, Daa'if gudeheede

821) Dayrkii adkaa iyo dugsade, degelladoodiiye

822) Dumar iyo carruur iyo ka tage, duunyo fara wayne

823) Taladii Durayd[1] iyo la garay, duqa warkiisiiye

824) Dabbaabado ayaa loo dalbaday, lagu duqeeyaaye

825) Damqan waaye oo maalmo badan danabku saarraaye

826) U ducee kolkaas oo ka noqoy, Nebigi Daahaaye

827) Dabadeedna duunyada u dhiib, diracyadiisiiye[2]

828) Deeblaha[3] rag baa boqol ka helay, dahabna dheeraaye

829) Oo weliba duulkii u badan, diinta soo galaye

830) Dubaaqii[4] Ansaareed ayaa, uu dareen galaye

831) Diirkay ka qaadeen waxay, dihatay laabtoode

832) La dardaaran Nebiguna raggaa, Daa'in amarkiiye

833) Daahuu ka rogay xaajadii, dabaqu saarraaye

834) Dooddooda waa kii u yidhi, dacalladoodiiye

835) Isaguna docdiisuu naqsaday, deeqda uu galaye

836) Wuxu yidhi dadkoo idil hadday, dhan u dareeraanba

837) Dariiqii Ansaar ay martaan, dabada haystaaye

838) Dadku inuu daraahiim la tago, idinna dookhiinna

---

[1]- Durayd ibnu Simmah

[2]- Raggii diinta lagu soo dumayey.

[3]- Geela.

[4]- Maskax.

839) Dar Ilaahay uu Nebiga yahay, darajo saw maaha?

840) Dabcan bay dheheen una ducee, deeqsigii Nebiye

841) Doorkay heleen baa lahaa, dux iyo iimaane

842) Iyagaa daruur iyo hantiyey, malabki Doocaane

843) Inta kalana duulduul yar bay, dibinta saareene

844) Ka dareere goortii nafaha, loo durbaan tumaye

845) Dooggiyo barwaaqada ninnaba, looma daa'imin.

DUULLAANKII TABUUK

846) Soddon kunoo dagaal yahan, ayaa laysu soo tubaye

847) Nebiguna u saaf meelihii, sahanku maagnaaye[1]

848) Sidoo kalana waatay wax badan, sadaqadaysteene

849) Niman baa far iyo suul ku riday, saxanki goobtaase

850) Niman baa iyana suus[2] la yimi, barako saarrayde

851) Sacab timira kay tahay la keen, ruuxba sarartiiye

852) Sagaal boqol Cismaan[3] baa la yimi, soobirkuu[4]dhaqaye

853) Abuu bakar Siddiiq baa isana, keenay sahaydiiye

854) Senti[5] uga ma tegin xoolo uu, siiyo reeraha e

855) Subxaankii abuuriyo Rasuul, saaciduu helaye

856) Silic iyo rafaadkii ayey, dhabu socdaaleene

857) Salbabakhe raggii gaaladee, soo hamaansadaye[6]

858) Siigada ayey uuradii, samada geeyeene

859) Soo noqoy Rasuulkoo mar kale, cadawga saameeye

860) Saansaan shareed iyo ma arag, sixirradoodiiye

861) Nimankii sumaysnaa ka hadhe, safarki dheeraaye

862) Xertii ina Saluul iyo gabbade, sadh iyo daacuune

---

[1]– Inta badan Nebigu SCW marka uu duullaan qaadayo waa uu raadgadan jiray, jihada uu rabo maahane jiho kale ayaa uu aadi jiray, laakiin duullaankan toos baa saxaabada loogu sheegay meesha loo socdo.

[2]– Saac, galaan qaada 2.5 kg.

[3]– Cismaan ibnu Cafaan.

[4]– Geel.

[5]– Wax yar.

[6]– *Afka soo kala qaaday*: soo duulay ayaa laga wadaa.

863) Niman saalixiinaa iyana, seegay taladiiye

864) Saddexdii saxaabada ahayd, suurad lagu sheegye[1]

865) Muddaan loo sanqadhin sheeko ay, sadar ku qooyaane

866) Saaamaxaadda waatii carshiga, looga soo diraye

867) Wanaaggay sameeyeen ayey, sado[2] ku maaleene

868) Sidqigaa[3] u wacan guusha ay, sinaha saareen.

XAJKII ABUU BAKAR

869) Amiir buu cayimay Nebigu uu, hawl ku aamminaye

870) Abuu Bakar ayaa uu ka dhigay, odayga koowaade

871) Xajka aad ayaa uu ku yidhi, umadda maareeye

872) Una sheeg tacaaliimta iyo, amarka diimeede

873) Qof asturan ayaa soo xajiyo, ruux Islaam noqone

874) Inta kale se inay soo noqdaan, u oggolaan waa.

SANNADKII WEFTIYADA

875) Diintii Ilaah bay dad badan, dalaq yidhaahdeene

876) Daws iyo waxaa soo muslimay, ururradii Day e

877) Duqaydii Thaqiif iyo muslime, daarihii Yamane

878) Degellada Najraan iyo muslime, daafihii Bulaye

879) Dudda[4] reer Hamdaan iyo muslime, duulashii Suda e[5]

880) Dulmigii halkaasuu ku jabay, damaca waallaaye

881) Daandaansigii la iska daa, dabinki shaydaane

882) Deegaanno badan buu ku fiday, damalka tawxiide

883) Xaqii lala dagaallami jiraa, loo durbaan tumaye

884) Damaashaade goortay waxyiga, dibinta saareene

---

[1]- Hilaal ibnu Umaya, Kacab ibnu Maalik, Muraara ibnu Rabiica.

[2]- Xoolaha la siiyo boqorrada, waxa laga wadaa nimco iyo wanaag.

[3]- Runta.

[4] - Cid meel wada deggan.

[5]- Dhammaan erayadaasi waa magacyo qabiillo diinta soo galay.

885) Diihaalladii[1] ay qabeen, laga he daaweeye
886) Dulmanii xaqiisii la sii, dayacu saarraaye
887) Daallinkii dhibkaa baday isana, loo dardaar weriye
888) Dabadhilifka nimankii ahaa, doorkan laacdame e[2]
889) Dusha nimanki laga raran jiraa, diiday gaalada e
890) Darajay heleen aan bilaash, lagu dabbaaleen.

XAJKII SAGOOTINTA

891) Sannadkii tobnaad wuxu ahaa, xajul wadaaciiye
892) Wadartii saxaabada ahayd, weriye khayrkiiye
893) Weeleeye hadalkuu ku yidhi, Nebigi waynaaye
894) Wax kastoo xumaan iyo dulmiya, wawga sii digaye
895) Ilaah Waaxiduu marag gashaday, weedha uu yidhiye
896) Walaaloobe nimankii ahaa, boqol kun oo wiile
897) Wada raace Nebigoo xumaan, laga he waantowye
898) Waa kii Ilaahay kammilay, wacadka diimeede
899) Lagu wiirsay[3] nacabkii dhammaan, damaca waallaaye
900) Cumar baa werweray oo ka baqay, walax nuqsaantaaye
901) Waatay sidaa noqotayeey, Nebiga waayeene
902) Wadka Eebbe uu qoray ma dayn, ruux wanaag falaye
903) Ma walaaco goortuu middiyo, waran afaystaaye
904) Dhaaxuu wadaad iyo wabiin, wadhay xabaalaaye
905) Dhaaxuu wadnaha uu ka muday, ruux war aan qabine
906) Dhaaxuu wadaamaha ka jaray, wiilal shubay ceele
907) Waakii Salaan[4] yidhi raxmadi, wehel ha siiseeye
908) "Waa uun wad yahan shay adduun, lagu wayiigaa"

[1] - Gaajo aad u daran
[2] - Waxa laga wadaa nimankii Carbeed ee ahaan jiray kuwo raacsan Faaris iyo Ruum, oo maantaas noqday niman laga haybadaysto.
[3]- Lagu digay.
[4]- Salaan Carrabay.

GEERIDII NEBIGA SCW

909) Nebigii udgoonaa ayaa, aaday aakhiro e
910) Adduunyada waxaa uu ka tegay, subax isniinaade
911) Ajashiisa lama baajinnine, socoy ayaantaase
912) Anfariir ayey noqotayoo, waa afkalaqaade
913) Saxaabadana qaar baa inkiray, waxay arkaayeene
914) Ul[1] buu Cumar usoo qaatayoo aammusuu yidhiye
915) Ninkii geeri sheegana inuu, dilo ogaysiiye[2]
916) Abuu Bakar markuu waaniyey, wada islaaxeene
917) ilmaday qubeen baa in badan, qoysay oogada e
918) Inay xukun Ilaah tahay ayey, wada ogaadeene
919) Arbacadina waatay kolkaa, Nebiga aaseene
920) Halkii uu ku go'ay bay xabaal, uga sameeyeene
921) Isagoo asturan bay dhaqeen, ehelladiisiiye
922) Odaygii Cabbaas iyo Calaa, loo igdamay taase
923) Kolkaasay asxaabtii galeen, idil qolkiisiiye
924) Toban toban ayaa ay salaad, ugu dul oogeene
925) Iftiin baa ka damay aan la arag, shay la ayniya[3]

GUNAANAD

926) Waa Eebbe mahaddii haddaan, maansadii xidhaye
927) Siirada macaanka leh ayaan, mariyey maandhoowe
928) Moolkeeda[4] uma dhaadhicine, waan dul mayracaye
929) Inahaa muhiimka ah, ayaan meesha soo dhigaye
930) Wixii aan maldahay ama se aan, marin xun qaadsiiyey
931) Mawlahay ayaan toobaddii, magansan doonaaye
932) Rabbigeen ku maamuus ammaan, mudaneheenniiye

---

[1] - Nabar baa laga wadaa, sida: seef.

[2] – Qofkii dheha: "Nebigi SCW waa uu dhintay", in uu dilayo ayuu u sheegay.

[3]– Cid la mid ah.

[4] – Meel biyo fadhiyaan oo dhulka aan la gaadhi karin ama aad u fogyahay.

933) Malaa'iigtu way meeriyaan, maxabbo awgeede
934) Mu'miniinna waa laga rabaa, maalin joogaba e
935) Misna waa biyaha ruux dambiga, lagaga maydhaaye
936) Marra waaba daawada qofkay, murugo haysaaye
937) Aakhirana Nebi Muxammad baa, lala mataanayne
938) Meeqaam saraa lagu helaa, lala macoobaaye
939) Kan macaashka raacdaynayoow, marinku waa kaase
940) Meel kaleeto inaad raadisaa, ma'aha maandeeqe
941) Ku mintida salliga Suubbanaha, waa la maqashiine
942) Markaasuu intii soo xustaba, mahadin doonaaye
943) Maashaa Allaahuye salligu, mahurto weeyaane
944) Waa maal ma guuraan ah oo, midigta kuu yaalle
945) Waa maqalka[1] xoolaha ninkii, meherad haystoowe
946) Malaayiin kun baad ugu tagtaa, moolka aakhiro e
947) Macdan weeye qaaliya ninkii, madhaxsanaayoowe[2]
948) Meerkuriga aan raadinniyo, malabsan weeyaane
949) Martisoorka aakhiro ayaad, mahadin doontaaye
950) Mugga hadalku yuu ila durkine, waxan ku muuneeyey
951) Nin walaw ba midhahaa ku guro, marada aad hayso.

DUCO IYO DARDAARAN

952) Suubbanii Ilaah soo diree, samada loo qaaday
953) Sayidkii saldanaddiisu ay, dunida saamaysay
954) Sakhigii[3] wax bixin laga la simay, sagalka[4] hooraaya
955) Saboolnimona aan uga tegayn, inu ku sooryeeyo
956) Salaadaha dartood mudanihii, safantu ay jeexday
957) Sabir badanihii loo jirrabay, diinta sababteeda

[1] - Sanduuqa dhaqaalaha lagu guro.
[2] -Wax tashiilid
[3] - Deeqsi.
[4] -Daliigo cascas oo moodda galbeed u eg oo xilliga roobka aroortii cirka ku dhigma.

958) Saamixidda Nebigii yiqiin, gacan sarrayntiisa
959) Safka hore halyeygii ku jiray, seben colaadeedka
960) Soomajeeste aan abid ka baqan, waranka seeraara
961) Oo safarro dhaadheer u maray, sugidda tawxiidka
962) Siirada udgoon mawlihii, ku xardhay sooyaalka
963) Sameheenna Nebigii u galay, silic maceeshaadka
964) Surmigiyo[1] abaaraha midkii, sadarku[2] uu xoodmay
965) Surimada Iblays uu fadhiyo, macallinkii saafay
966) Ku salliya Rasuulkii khalqiga, samaha gaadhsiiyey
967) Ku Salliya Rasuul aan lahayn, sadar[3] yar oo ceeb ah
968) Ku salliya Rasuul nala jeclaa, inaynnu soo gaadhno
969) Salaan baan hawada kuu marshaa, saacadday tahaye
970) Jimcahana siyaadaan ku dari, saamigaan rabo e
971) Subxaanoow Allahayow kuwii, Nebi la saaxiiba
972) Ee saraha dhaadheer jannada, kula sugnaanaaya
973) Saatiroow adaa Qaadiree, subaxan kaa tuugnay
974) Sharcigiisa kuwa sii wadee, sare usii qaada
975) Xadiithyada saxiixa ah kuwii, camal ku suureeya
976) Sunnadiisa kuwa raaca ee, saani ugu jooga
977) Saatiroow adaa Qaadiree , subaxan kaa tuugnay
978) Marka suurka loo tumo khalqiga, sida na loo sheegay
979) Ee aakhir seben ay tahee, samadu naafowdo
980) Ee ubadku selelee khalqigu, wada silloonaado
981) Kuwa samaha maalee carshiga, hooska laga siiyo
982) Salliyada xariirta ah kuwii, dhabanka loo saaro
983) Ee silica ay soo mareen, maca salaameeya
984) Ee saxammo waawayn jannada, lagaga sooryeeyo
985) Ee sawjad qaaliya helee, aqalna loo seeso

[1]- Harraad.
[2] - Laabta.
[3] - Xarriiq yar.

986) Ee sareedo maalee nimcada, samo ku haaneeda[1]

987) Ee sabawanaag iyo ku fura, socodka meel toosan

988) Saatiroow adaa Qaadiree, subaxan kaa tuugnay

989) Allahayoow kuwii soonka iyo, camalku saameeyo

990) Ee xaqa sargooyee haddana, saxar ka dheereeya

991) Ka sarriigta[2] xumahee haddana, sabirka joogteeya

992) Ee ubadka soo kacaya iyo, saraca[3] maareeya

993) Ee xaqana saacida sharkana, wada sarwaaneeya

994) Ee sakada bixiyee dartaa, suxul madoobaada

995) Ee soobir iyo awr u qala, socoto gaajaysan

996) Salaadaha kuwii ooga ee, sunanta joogteeya

997) Saqda dhexe habeenkii kuwii, sacabka kuu taaga

998) Ee saamax fidiyee xiqdiga, saafi ka ahaada

999) Sadbursiinyo[4] aan yeelan ee, sima garsoorkooda

1000) Ee aan ka siibane sharciga, dhab ula saaxiiba

1001) Saatiroow adaa Qaadiree, subaxan kaa tuugnay.

DHAMMAAD

ALLAA MAHAD LEH

[1] - Hab wanaagsan.

[2] - Dhawrashada sharafta la dhawrto

[3] -Asalka kelmaddu waa Carabi, waxana laga wadaa *dalag*, laakiin se halkan waxa looga jeedaa waxsoosaarka oo idil.

[4]-Si xoog iyo sharcidarro ah oo hanti iwm loo qaato.